

UNIVERSITY OF GOTHENBURG
DEPARTMENT OF LANGUAGES AND LITERATURES
P.O.B. 200 • SE 405 30 GOTHENBURG

We offer [net-based courses](#) in Somali
free of charge for citizens of the EU and EEA

BEGINNER'S SOMALI READER PART 3

*Assembled, adapted and tone-marked by
Morgan Nilsson*

Will be updated for autumn term 2023. Don't print anything yet.

Updated
21 November 2022

This is work in progress. Read it critically!

Feel free to contact me with comments.

morgan.nilsson@gu.se

Preface

The majority of texts in this reader have been collected from different Somali schoolbooks published since the beginning of the 1970's until today, in Mogadishu, Hargeysa and Jigjiga. Where necessary, some of the texts have been slightly adapted (orthographically standardised, grammatically or factually corrected, lexically or syntactically simplified etc.), and some of the texts have been tone-marked.

The dialogues were originally published in a textbook called *Beginning in Somali*, written before the introduction of Somali as the official language of Somalia. Since no official orthography had then been agreed upon, the textbook was written in a unique phonetic script. Therefore, with the kind encouragement of Richard D. Molitor, one of the original authors, the dialogues have been transcribed in today's standard Somali orthography.

Many of the original publications can be retrieved from [Archivio Somalia](#):

J.J. Pia, P.D. Black & M.I. Samater. 1966. [Beginning in Somali](#). Syracuse University, NY.

J.J. Pia & R.D. Molitor. 1969. [Reading in Somali: An Elementary Cultural Reader. Volume I: Reader](#). Syracuse University, NY.

J.J. Pia & R.D. Molitor. 1969. [Reading in Somali: An Elementary Cultural Reader. Volume II: Pony and Glossary](#). Syracuse University, NY.

Sound recordings & Tone marked texts

Mp3 files with recordings of many of the texts can be found at

<https://canvas.gu.se/courses/26872/modules/items/455523>

Speakers

1 / B1	man from Beledweyne
2 / M2	man from Mogadishu
3 / M3	man from Mogadishu
4 / K4	man from Kismaayo
5 / H5	man from Hargeisa
6 / D6	woman from Dhagaxbuur
7 / M7	man from Mogadishu
8 / G8	man from Garoowe
9	woman
10	man

Symbols

The tone marking reflects the way the speakers pronounce the texts in the individual recordings. There will often be alternative ways of pronouncing the same words or phrases.

á	an accent marks high tone
á'	two accents mark exceptionally high tone
ā	a bar marks reduced, less prominent high tone
a'	an accent after a word indicates phrase final rising tone
aaaa	four vowels indicate an excessively long vowel
?	a small question mark indicates a suspected slip of the tongue
/	a slanted line indicates a noticeable pause

Contents

1. Laba wiil iyo haramcad	5
Wadahadallo 55	8
2. Nin iyo daanyeerkiisii.....	10
Wadahadallo 56–57	13
3. Deriskeenna (M)	15
3. Deriskeenna (H).....	20
Wadahadallo 58–59	25
4.1 Faadumo saaxiibteeda cusub.....	28
4.2 Saaxiibbo wanaagsan.....	32
Wadahadallo 60	34
5.1 Dugsigayga.....	36
5.2 Fasalka Faadumo.....	37
Wadahadallo 61	39
6. Deriskeenna.....	41
Wadahadallo 62	47
7.1 Ciyaarta kubbadda cagta	49
7.2 Diin	52
Wadahadallo 63	54
8.1 Diin iyo bakayle.....	56
8.2 Magacyo.....	61
Wadahadallo 64–65	63
9. Hawlaha ka socda deriska	66
Wadahadallo 66	72
10.1 Diin iyo shimbiro.....	74

10.2 Naxwe	77
Wadahadallo 67–68	80
11. Saddex dibi iyo libaax.....	83
Wadahadallo 69	90
12. Hawlaha ka socda deriska	92
Wadahadallo 70–71	98
13. Baqashii iyo cusbadii	100
Wadahadallo 72	104
14.M Goorma ayaa aan dhimanayaa?	107
14.H Goorma ayaa aan dhimanayaa?.....	110
Wadahadallo 73	113
15. Hawlaha ka socda deriska	115
Wadahadallo 74	121
16.1 Dawaco, diin iyo bakayle	123
16.2 Labadii tuug	127
Wadahadallo 75	131
17.1 Libaax iyo jiir.....	133
17.2 Libaaxyo.....	137
Wadahadallo 76	140
18. Hawlaha ka socda deriska	142
Wadahadallo 77	147

1. Laba wiil iyo haramcad

Maxamed iyo Nuur waxa ay ahaayeen saaxiibbo. Maalin maalmaha ka mid ah ayey waxa ay socod u aadeen meel kayn ah. Kaynta waxaa ku noolaa xayawaan badan oo duur-joog ah. Nuur waxa uu noqday mid baqdin badan.




Maxamed ayaa yiri, "Haddii aan dugaag aragno, anigu kaaga carari maayo ee waan ku kaalmaynayaa."

Nuur ayaa **ku** jawaabay, "Aniguna sidaa is le'eg baan kuu gargaarayaa haddii uu bahal ina soo weeraro."

Muddo yar dabadeed waxa ay maqleen ci xayawaan ee hoose. Hareerahooda haddii ay wax yar eeg-eegeen, waxa ay arkeen haramcad in yar u soo jira.

mid -ka one | en
baqdin -ta fear | rädsla, oro, fruktan
baqdin badan fearful | räddhågsen


haddii if | om
dugaag -ga wild animal | vilddjur
cararaa, carartaa flees, runs away | flyr
carari maayo = ma cararayo
ee but | utan
sidaa(s) that way | (på) det sättet
isle'eg (< is + la + eg)
equal | likadan, samma
gargaaraa helps (in an emergency) | hjälper (i nödsituation)
bahal -ka wild animal | vilddjur
ina us | loss
weeraraa, weerartaa attacks | attackerar
muddo -da period of time | period, tidsintervall
hareer -ta side, edge | sida
pl. hareero -ha surroundings | omgivning
ci -da cry, roar | ord som härmar vissa djurs läte
hoose low, quiet | låg, tyst
hareerahooda their surroundings, around them | deras omgivning, runt omkring dem
haddii (+ past tense) when | när



Markiiba Nuur waa uu cararay. Maxamedna waxa uu bilaabay in uu fuulo geed u dhowaa. Laakiin **markii uu dhex marayo** ayaa uu geedkii ka sibxaday oo uu soo dhacay.

markiiba *quickly; at once; immediately | snabbt, genast*

sibxadaa, sibxataa = sibiibixdaa, sibiibixataa *slides, slips | halkar, slinter, glider*



Dabadeed waxa uu arkay haramcadkii oo in yar u soo jira. Waxa uu ku fekerey **oo** uu ku tashaday **in** uu jiifsado **oo** uu iska dhigo meyd. Waxa uu filayey in uu haramcadku sidaas kaga tagayo.

fekeraa *thinks | tänker*
tashadaa, tashataa *makes a decision | bestämmer sig, väljer ett alternativ*

dhigaa *puts | placerar*
iska dhigaa *pretends | låtsas*
meyd -ka *corpse | död kropp, lik*
filaa *believes, hopes | tror, hoppas*
dul -sha *surface; over, above | ovensida, yta; över, ovanför*

dhaqaaqaa *moves, makes a movement | flyttar sig*

Haramcadkii inta uu Maxamed dul yimid ayaa uu meel waliba ka ursaday. Markii uu ka waayey meel dhaqaaqda, ayaa uu iskaga tegey.

alla *each, every | varje*
mar alla iyo markii *as soon as | så snart*

Mar alla iyo markii uu haramcadkii tagey, waxa soo noqday Nuur. Waxa uu weydiyey saaxiibkiis, "War, maxaa uu haramcadku kuu

war = **waryaa** *hey | hördu*

sheegayey markii uu afka dhegta kuu saaray?"

Maxamed ayaa ku jawaabay, "Ha raacin saaxiibbada kaa carara marka aad u baahan tahay kaalmadooda."

dheg -ta ear | öra
saaraa, saartaa puts,
places | placerar

kaa (< ku + ka) from ... you | från
... dig
kaalmo -da assistance, aid,
help | hjälp, assistent

Uga jawaab su'aalahan buuggaaga layliga.

1. Xaggee bay wiilashu aadeen?
2. Xayawaankee baa fiirsanayey?
3. Maxaa uu Nuur sameeyey markii uu arkay haramcadkii?
4. Maxaa uu Maxamed sameeyey markii uu arkay haramcadkii?
5. Maxaa uu haramcadkii u dili waayey Maxamed?
6. Maxaa uu Maxamed u sheegay Nuur oo uu haramcadku ku yiri?
7. Ma **u malaynaysaa** in haramcadkii la hadlay Maxamed?
8. Wiilkee baa saaxiib run ah ahaa?

maxaa + u for what, why? | för vad,
varför?
dilaa hits, kills | slår, dödar
waayaa fails | misslyckas

U shaqeeya koox-koox, kana dooda.

Maxaa aad samayn **lahayd** haddii aad la socon **lahayd** Maxamed iyo Nuur maalintaas?

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 5–8

Wadahadallo 55

55.0

- Oo hadmaad dhalatay?
- Waxaan dhashay shan iyo tobankii Sebteembar kun iyo sagaal boqol iyo sidded iyo sagaashankii.
- Wallaahi! Oo markaa saddex iyo labaatan jir baad tahay.

hadmaad < hadma? + aad
hadma? *when? | när?*
had -da *moment | ögonsblick*

55.1

- Layla, ma reer Hargeysaa tahay?
- Haa. Waxaan ahay reer Hargeysa, laakiin immika Burcaan deggan ahay. Muqdishana waxaan tagayaa bishan toddoba iyo tobankeeda.
- Ma macallimad baa tahay immika mise karaaniyad?
- Waxaan ahay macallimad.
- Oo hadmaad dhalatay?
- Waxaan dhashay kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo siddeetankii.
- Wallaahi! Oo markaa kow iyo afartan jir baad tahay.
- Haahey.

55.2

- Axmed, xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Baraawe.
- Baraawe Muqdisho miyay ka fog tahay?
- Maya. Waxay u jirtaa laba boqol oo kiiloomitir.
- Ma Baraawaad ku dhalatay?
- Haa. Baraawaan ku dhashay.
- Hadmaad dhalatay?

- Waxaan dhashay kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo sagaashankii.
- Immika maxaad qabataa?
- Askari baan ahay.

55.3

- Maxaad sheegtay?
- Nabad baan sheegay. Adigu iska warran.
- Nabad.
- Ma waxaad ka timid Boorame?
- Haa.
- Boorame xaggay ka xigtaa Hargeysa?
- Waxay ka xigtaa galbeed.
- Ma Booramaad ku dhalatay?
- Haa. Waxaan ku dhashay Boorame.
- Hadma?
- Kun iyo sagaal boqol iyo shan iyo siddeetankii.
- Wallaahi! Oo markaa lix iyo soddon jir baad tahay.
- Haahey.
- Oo maxaad qabataa immika?
- Waxaan ahay milateri.

Magacaygu waa Axmed. Waxaan ahay fuundi wax ku bartay jaamacadda Uppsala sanadkii 2010-kii, kadib waxaan shaqo ka billaabay xarunta luuqadaha magaalada Stockholm "Språkcentrum" waxa aan ku shaqeeynaayay macallinnimo illaa sanadkii 2020-kii. Hadda waxaan wax ka dhigtaa jaamcadda Stockholm oo aan ka barto macalinnimada maadooyinka xisaabta iyo farsamada. Koorsadan iyo kuwa lamida oo aan horay usoo dhigtay waxay ii sahli doonaan inaan helo ruqsada macallinnimada Afsoomaaliga. Mararka qaar waxaan ka shaqeeyaa xafiiska isdhexgalka bulshada ee Stockholm. Waxaan ku noolahay magaalada Stockholm tan iyo 2004-tii. Waxaan jeclahay ciyaaraha gaar ahaan kubadda cagta, dabaasha iyo jimicsiga, waxaan dheelaa usbuucii laba jeer, waxa kale oo aan xiiseeyaa akhriska iyo inaan asxaabteyda kulanno ugu yaraan sitimaankii mar. Waad mahadsantiihin /Axmed.


2. Nin iyo daanyeerkiisii

Inta aadan^S/aanad^N akhrin ka hor

Marmar waxa aan la saaxiibnaa xayawaanka.

Ma leedihiin xayawaan guriga lagu rabbaayadeeyo^S/rabbeeyo^N?

Waxa aad akhrin^S/akhriyi^N doontaa sheeko ku saabsan nin iyo daanyeer^S/daayer^N rabbaayad ahaa.



Waxa la yiri nin baa beri kayn ka helay daanyeer **yar oo dhallaan ah**. Ninkii waxa uu daanyeer^Skii u qaatay gurigiisii si uu u xannaanaysto.

Waxa dhacday in daanyeer^Skii yaraa koray oo uu weynaadey oo uu xoogeystey. Daanyeer^Sku waxa uu aad iyo aad u jeclaa ninka koriyey oo uu meel kasta u raaci jirey. Ninkii iyo daanyeer^Skii waxa ay noqdeen saaxiibbo isku fiican.

inta ... aan ... ka hor before | innan
la saaxiibnaa is friends with | är vän med

marmar sometimes, now and then | ibland, då och då

rabbaayadeeyaa / rabbeeyaa håller som tamdjur | keeps as a domestic animal

ku saabsan about | (som handlar) om

rabbaayad -da tame animal | tamt djur

waxa la yiri it has been said | det sades

beri -ga once (in the past) | en gång (i det förflutna)


dhallaan -ka small children, infants | småbarn, ungar

si + u in order to, so that | för att, så att

xannaanaystaa, xannaanaysataa looks after, cares for, nurses | tar hand om

koraa, kortaa grows | växer

oo and | och



Daanyeerku waxa uu ilaalin jirey ninkii oo uu ka taxaddari jirey. **Ma uusan oggolaan jirin** in qof u soo dhawaado. Ninkii saaxiibbadiis ayaa kaga soo dacwooday daanyeerkaa. Laakiin ninkii **ma uusan doonayn** in uu daanyeerkiisa **meel** ku xiro.

oggol yahay, inf. oggolaan
approves, allows | accepterar, tillåter
dacwoodaa, dacwootaa
complains, protests | klagar
xiraa, xirtaa *ties, fastens, arrests | binder, stänger in, fängslar*



Waxaa la yiri maalintii dambe ayaa duqsi yari soo cararay oo wejiga ka fuulay ninkii oo hurda. Daanyeerkaa xoogga weynaa waxa uu ka caroodey duqsiga fuulay saaxiibkaa, waxana uu doontay dhagax weyn oo uu ku dilo duqsiga.

maalintii dambe *the next day | nästa dag*
duqsi -ga *fly | fluga*
doontaa, doonataa *seeks, fetches | söker, hämtar*
caroodaa, carootaa *is/becomes angry | blir arg*

walwaalaa *picks up, carries something heavy | tar upp (från marken), bär (ngt tungt)*


Daanyeerkaa waxa uu soo walwaaley dhagax oo uu kor u soo qaaday. Dabadeed waxa uu la dul yimid ninkii wejigiisa oo weli hurda.

Alla! Maxaa aad u malaynaysaa in ay dhaceen? Duqsigii yaraa waa uu iska duulay. Ninkiina waa uu soo kacay oo waxa uu dilay daanyeerkaa.

alla *oh* (expresses surprise) | *oj, åh*
(uttrycker förvåning)
duulaa, duushaa *flies* | *flyger*
düülaa, düüshaa *attacks* | *anfaller*

Ka dooda su'aalahan. U shaqeyya koox-koox

1. Maxaa uu daanyeerku keligii u joogay kaynta?
2. Ma u malaynaysaa in daanyeerku ku ag noolaa ninka waqti dheer?
3. Daanyeerku ma jeclaa ninkii lahaa?
4. Maxa ay u jeclaan waayeen ninka saaxiibbadiis?
5. Maxaa uu sameeyey ninkii markii uu duqsigu ku istaagay wejigiisa?
6. Maxaa uu daanyeerku u xanaaqay?
7. Maxaa uu daanyeerku u raadsaday dhagax weyn?
8. Maxaa ku dhacay ninkii?
9. Maxaa ku dhacay duqsigii?
10. Maxaa ku dhacay daanyeerkaa?



ku ag *near, at sb's place* | *nära, hos*

xanaaq -a *anger* | *ilska*
xanaaqaa *becomes angry* | *blir arg*
raadsadaa *looks for (for oneself)* | *söker (för egen del)*

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 9–12

Wadahadallo 56–57

56.0

- Wuxuu dhashay kun iyo sagaal boqol iyo saddex iyo sagaashankii.
- Immikana waa laba kun iyo kow iyo labaatankii.
- Markaa waa immisa jir?
- Waa siddeed iyo labaan.

57.0

- Boorame Hargeysa ma waxay u jirtaa intay Bulaxaar u jirto halkaa.
- Haa. Boorame intaasay u jirtaa.
- Waxay u jirtaa boqol iyo soddomeeyo kiiloomitir.

u jirtaa *is situated (at a distance) to (from)*

intay coll. = **inta ay** *the distance that (it)*

intaasay coll. = **intaas bay**

intaas *that distance*

soddomeeyo *a bit over thirty, some thirty | drygt trettio, ett trettioal*

57.1

- Cabdi, ma waxaad tagaysaa Burco?
- Haa. Halkaasaan tagayaa.
- Intay u jirtaa Berbera?
- Waxay u jirtaa shan iyo lixdameeyo kiiloomitir.
- Ma waxay u jirtaa intay Hargeysa u jirto halkaa?
- Maya. Way ka fog tahay.
- Immisa kiiloomitir bay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa boqol iyo labaan kiiloomitir.
- Bulaxaarna ma intaasay u jirtaa?
- Maya.

halkaasaan coll. = **halkaas baan**

intay? coll. = **intee bay?** *what distance*

lixdameeyo *a bit more than sixty, approximately sixty | drygt sextio, ett sextioal*

halkaa = halkaas *there*

57.2

- Aabbahaa ma wuxuu deggan yahay Itoobiya?
- Maya. Ceerigaabuu deggan yahay.

Ceerigaabuu coll. = **Ceerigaabo buu/ayuu**

- Hargeysa Ceerigaabo ma waxay u jirtaa intay Bulaxaar u jirto halkaa.
- Maya. Ceerigaabona Hargeysa waxay u jirtaa afar boqol oo kiiloomitir, laakiin Bulaxaar waxay u jirtaa halkaa boqol iyo tobaneeyo kiiloomitir.
- Booramena ma intaasay u jirtaa?
- Maya. Waxay u jirtaa boqol iyo soddomeeyo kiiloomitir.

57.3

- Waryaa, Xasan, xaggeed ku dhalatay?
- Waxaan ku dhashay Cadan.
- Cadan intay u jirtaa Berbera?
- Way ka fog tahay.
- Markaa ma waxay u jirtaa intay Hargeysa u jirto Ceerigaabo mise intay Bulaxaar u jirto Boorame?
- Waxay u jirtaa intay Hargeysa Ceerigaabo u jirto.
- Oo intaasi ma afar boqol oo kiiloomitir baa?
- Haahey.
- Ma Cadan bay ku nooshahay walaashaa?
- Haa. Laakiin Burcay tagaysaa immika.

xaggeed? coll. = **xaggee baad?**

intay? coll. = **intee bay?**

intaasi *that distance* (subject)

Burcay coll. = **Burco bay**

3. Deriskeenna

Muqdisho 2001

Qaybta 1aad

Saynab iyo saaxiibteed waa fasalka 3aad. Marka ay dugsiiga ka timaaddo waxa ay kubbadda kolayga la ciyaartaa saaxiibteed.



Maxaa aad wada qabataan adiga iyo saaxiibtaa dugsiiga dabadiisa?

Saynab iyo saaxiibteed waa ay isku ag nool yihiin. Waxa ay yihiin deris.

Adiga yaa kula deris ah?

Kaalmada deriska

Qof ka mid ah Saynab deriskeeda ayaa ah habar da' weyn. Ma ay dhalin wax carruur ah oo daryeela.

Saynab hooyadeed ayaa u karisa cuntada habartan la deriska ah.

deris -ka coll. *grannar, grannskap* | neighbours, neighbourhood
saaxiib -ka *manlig vän* | male friend
saaxiib -ta = saaxiibad -da
väninnna | female friend
kolay -ga *korg* | basket
kubbadda kolayga *basket* | basket ball

wada tillsammans | together
qabtaa, qabataa *gör* | does
dabadiisa *dess slut, efter* | its end, after

isku ag nära (*till*) *varandra* | close to each other

adiga = ku dig | you
yaa? < *ayo+baa *vem?* | who?
kula med dig | with you

kaalmo -da *stöd* | support

habar -ta *äldre kvinna* | old woman
da' -da weyn *hög ålder* | high age
dhalaa föder | gives birth
wax any | någon
daryeela *sköter om* | cares for
kariyaa, karisaa *kokar, lagar* | cooks



qaadaa, qaaddaa *tar, takes*

Ka dibna waxa ay cuntada u qaaddaa maalin walba deriskeeda.

Ma jiraa dad da' weyn oo ku nool deriskiinna? Maxaa aad qabataa si aad u kaalmayso?

kaalmeeeyaa *stöttar | supports*



qaar -ka *del, andel | part*
qaarkood *en del av dem | some of them*
bukaa, bugtaa *är sjuk | is ill*
miskiin -ka, coll. masaakiin -ta *fattig(a) | (the) poor*

Dadka ku nool deriskeenna qaarkood baa da' weyn. Dad kale ayaa buka. Dad kalena ayaa masaakiin ah. Waxa ay dadkani u baahan yihiin kaalmadeenna.



Dadka ku nool deriskeenna qaarkood baa curyaan ah.

Qaarkood baa indhoole ama dhegoole ah.

Qaarkood baa hadalku ka xiran yahay.

curyaan -ka *handikappad | handicapped*

indhoole -ha *blind person*
dhegoole -ha *döv person | deaf person*

ka xiran *closed, shut (off) from | stängd för, avstängd från*

Qaar kale ma socon karaan.

Eebbe ayaa inagaga dhigay waajib in aan caawinno dadkaa. Waa in aynu kaalmaynaa qofka buka iyo ka da'da weyn.

U shaqeeya kooxo.

Ka fikira dadka deriskiinna ah ee kaalmada u baahan.

Maxaa ay kooxdiiinu qaban kartaa si ay u caawiso dadkaa?

inagaga < ina+ku/ka+ka
waajib -ka *skyldighet, ansvar* |
obligation, responsibility
dadkaa = dadkaas
bukaa, bugtaa *is ill\är sjuk*
ka, ta *the + adj. | den + adj.*

koox -da *group | grupp*
ka fikiraa *thinks about | tänker på*

si ... u *för att | in order to, so that*
caawiyaa *hjälper | helps*

Daryeelidda carruurta

Carruurta yaryar ee ku nool deriskeenna waxa ay kaaga baahan yihiin kaalmo.


Carruurta yaryari ma garan karaan halista. Ma oga goobaha halista ah. Waa in aad ka qabataa marka ay u dhowaadaan waxyaabaha halista ah.

Eeg sawirradan. Sidee baa ay carruurta da'da weyni u ilaaliyaan carruurta ka yaryar?

daryeelaa *tar hand om | cares for*
daryeelid -da verbal noun

kaaga < ku+u+ka

halis -ta *fara | danger*
ma oga < **ma og + aha** *är inte medveten om | is not aware of*
goob -ta *place | plats*
wax -a, pl. waxyaabo -ha
thing | sak



U shaqeeya kooxo.

Magacow qaar ka mid ah goobaha inagu dhow oo halista u ah carruurta.

inagu < ina+ku
ku dhow *nära* | close to

Iskaalmaynta

Dad badan baa ku nool deriskiinna. Iyagu waa deriskiinna. Deriska qofba waxa uu caawiyaa qofka kale.

is *each other* | *varandra*
is kaalmeeyaan *de stöttar*
varandra | they support each other
iskaalmayn -ta *ömsesidigt stöd,*
samverkan | mutual assistance

Eeg sawirka. Sidee baa ay deriskani isu caawinayaan?

kiinna, tiinna *yours* | *er*
-ba *each, every* | *varje*
qofba *everybody* | *varje person, alla*
isu < **is + u**
sidee? + **u** *in what way?* | *på vilket sätt?*



Dadka derisku waa ay is ixtiraamaan. Waa dad is jecel.

ixtiraamaa *respects* | *visar respekt*
is sig (*själv*), *varandra*, *oneself*, *each other*

Adigu ma jeceshahay deriskiinna?

Maxaa aad samaysaa si aad deriskaaga u caawiso?

si + u *för att* | *in order to*


Diinta Islaamku waxa ay ina faraysaa in aynu is jeclaanno. Diinta Islaamku waxa ay ina baraysaa in qofba ka kale ka ilaaliyo dhibta.

faraa *ge ett råd* | *gives advice*

dhib -ta *svårighet,*
problem | *difficulty, problem*
ka, ta *the + adj.* | *den + adj.*
ka kale *the other* | *den andra*

Guddiga tuulada

Tuulada Saynab waxa ay leedahay guddiga tuulada. Guddigu waxa uu ka kooban yahay xubno oo iyagu matala dadka ku nool tuulada. Tuulo kastaa waxa ay doorataa guddoomiye iyo xoghaye, kuwaas oo ilaaliya danaha tuulada.



Guddiga tuulada waxa kale oo ay xukumaan dadka ku nool miyiga ku dhow tuulada. Madaxa guddigu waa hoggaamiyaha dadka ku nool dhulkan.

Madaxa guddiga tuuladu waxa uu isku xiraa dadka tuulada iyo guddoomiyaha degmada. Isaga ayaa ka mas'uul ah jawiga nabadeed ee dadka.

Yaa u madax ah tuuladiinna?

Ugu yeera isaga in uu yimaaddo fasalkiinna ka dibna uu idiin sharxo waxa uu guddiga tuuladu qabto.

guddi -ga *råd, kommitté* | council, committee

tuulo -da *by* | village

ka kooban *consisting of* | *bestående av*

xubin -ta, pl. **xubno -ha** *medlem* | member

matalaa *representerar* | represents

kastaa: -aa marks the subject

doorataa, doorataa *väljer* | chooses, elects

guddoomiye -ha

ordförande | chairman

xoghaye -ha *sekreterare* | secretary

dan -ta, pl. **dano -ha** *intresse,*

mål | interest, objective

waxa kale oo *dessutom,*

vidare | also, furthermore

xukumaa *styr, regerar (över)* | rules, governs

hoggaamiye -ha *ledare* | leader

dhul -ka *land, mark* | land

isku xiraa *förbinder x och y med*

varandra | connects x and y with each other

degmo -da *område, distrikt,*

kommun | area, district, county

mas'uul -ka *ansvarig*

person | responsible person

jawi -ga *atmosfär,*

klimat | atmosphere, climate

nabadeed *adj. freds-, fredlig,*

lugn | peace, peaceful

ugu yeeraa *uppmantar,*

ber | summons, calls, asks

sharxaa, sharaxdaa *förklarar,*

beskriver | explains, describes

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 1-7

3. Deriskeenna

Hargeysa 2010

Qaybta 1aad

Saynab iyo hablaha ay saaxiibbada yihiin waa fasalka 3aad. Marka ay Saynab dugsiga ka timaaddo waxa ay kubbadda kolayga la ciyaartaa habalaha ay saaxiibbada yihiin. hablo -ha pl. flickor | girls



Maxaa aad wada qabataan adiga iyo saaxiibbadaa ka dib marka ay xisaska dugsigu idiin dhammaadaan?

Saynab iyo hablaha ay saaxiibbada yihiin waa ay isku ag nool yihiin. Waxa ay yihiin deris.

Adiga yaa kula deris ah?

Kaalmaynta deriska

Qof ka mid ah Saynab deriskeeda ayaa ah habar da' weyn. Ma ay dhalin wax carruur ah oo daryeela.

Saynab hooyadeed ayaa u karisa cuntada habartan la deriska ah.



Ka dibna waxa ay cuntada u qaaddaa maalin walba deriskeeda.

Mayey jiraan dad da' weyn oo ku nool deriskiinna? Maxaa aad qabataa si aad u kaalmayso dadkaas?



Dadka ku nool deriskeenna qaarkood baa da' weyn. Qaar kale waa ay bukaan. Kuwo kale ayaa masaakiin ah. Waxa ay dadkani u baahan yihiin kaalmadeenna.



Dadka ku nool deriskeenna qaarkood baa curyaan ah.

Qaarkood baa indhoole ama dhegoole ah.

Qaarkood baa hadalku ka xidhan yahay.

Qaar kale ma socon karaan.

Alleh ayaa inagaga dhigay waajid in aan kaalmayno dadkaa. Waa in aynu kaalmaynaa qofka buka iyo ka da'da weyn.

U shaqeeya kooxo.

Ka fikira dadka deriskiinna ah ee kaalmada u baahan.


Maxaa ay kooxdiiinu qaban kartaa si ay u kaalmayso dadkaa?

Daryeelidda carruurta

Carruurta yaryar ee ku nool deriskeenna waxa ay kaaga baahan yihiin kaalmo.

Carruurta yaryari ma garan karaan halista. Ma oga goobaha halista ah. Waa in aad ka qabataa marka ay u dhowaadaan waxyaabaha halista ah.

Eeg sawirradan. Sidee baa ay carruurta da'da weyni u ilaaliyaan carruurta ka yaryar?



U shaqeeya kooxo.

Magacow goobaha qaarkood ee deriskiinna ah ee iyagu halista u ah carruurta.

Iskaalmaynta

Dad badan baa ku nool deriskiinna. Iyagu waa deriskiinna. Deriska qofba waxa uu caawiyaa qofka kale.

Eeg sawirka. Sidee baa ay deriskani isu caawinayaan?



Dadka derisku waa ay is ixtiraamaan. Waa dad is jecel.


Adigu ma jeceshahay deriskiinna?

Maxaa aad samaysaa si aad deriskaaga u caawiso?

Diinta Islaamku waxa ay ina faraysaa in aynu is jeclaanno. Diinta Islaamku waxa ay ina baraysaa in qofba ka kale ka ilaaliyo dhibta.

Guddiga tuulada

Tuulada Saynab waxa ay leedahay guddiga tuulada. Guddigu waxa uu ka kooban yahay xubno oo iyagu matala dadka ku nool tuulada. Tuulo kastaa waxa ay doorataa guddoomiye iyo xoghaye, kuwaas oo ilaaliya danaha tuulada.



Guddiga tuulada waxa kale oo ay xukumaan dadka ku nool miyiga ku dhow tuulada. Madaxa guddigu waa hoggaamiyaha dadka ku nool degaankiisa.

Madaxa guddiga tuuladu waxa uu isku xidhaa dadka tuulada iyo guddoomiyaha degmada. Isaga ayaa ka mas' uul ah xaaladda nabadeed ee dadka.

Yaa u madax ah tuuladiinna?

Ugu yeedha isaga in uu yimaaddo fasalkiinna ka dibna uu idiin sharxo waxa uu guddiga tuuladu qabtaan.

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010: 1–7

Wadahadallo 58–59

58.0

- Boorame ma intay Afgooye Hargeysa u jirto ayay **ayana** u jirtaa.
- Maya. Boorame boqol iyo soddomeeyo kiiloomitir bay u jirtaa Hargeysa, laakiin Afgooye waxay u jirtaa boqolaal kiiloomitir.

ayana / iyana coll. = **ayada / iyada**
-na she also, it also, they also | *hon/den/det/ de också*
boqolaal *hundreds | hundratals*

58.1

- Waryaa! Ma Soomaali baad tahay mise Xabashi?
- Waxaan ahay Soomaali.
- Ma Hargeysaad ka timid mise Muqdisho?
- Waxaan ka imid Boorame.
- Boorame xaggay ka xigtaa Hargeysa?
- Waxay ka xigtaa galbeed.
- Intay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa boqol iyo soddomeeyo kiiloomitir.
- Ma intay Burco Hargeysa u jirto ayay **iyana** u jirtaa?
- Maya, Hargeysa Burco way ka fog tahay.
- Immisa kiiloomitir bay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa laba boqol iyo tobaneeyo kiiloomitir.
- Anigu reer Hargeysaan ahay, laakiin Burcaan tagayaa immika.
- Ma aabbahaa baa deggan?
- Maya. Hooyaday baa deggan.
- Walaalahaa xaggay deggan yihiin?
- Iyana waxay deggan yihiin Burco.

Hargeysaad coll. = **Hargeysa baad**

xaggay? coll. = **xagge bay?**

intay? coll. = **intee bay?**

iyana coll. = **iyadana** *she also, it also, they also* | *hon/den/det/ de också*

tobaneeyo *a bit more than ten, approximately ten* | *drygt tio, ett tiotal*

Hargeysaan coll. = **Hargeysa baan**

Burcaan coll. = **Burco baan immika = imminka**

58.2

- Xaggeed ka timid immika?
- Waxaan ka imid Berbera.
- Ma Berberaad ku dhalatay?
- Haa. Laakiin immika Burcaan ku nool ahay.
- Burco ma intay Afgooye Hargeysa u jirto ayay iyana u jirtaa?
- Maya. Burco laba boqol iyo tobaneeyo kiiloomitir bay u jirtaa Hargeysa, laakiin Afgooye waxay u jirtaa boqolaal kiiloomitir.
- Ma waxaad jeceshahay in aad Berbera ku noolaato?
- Maya. Waxaan jeclahay inaan Burco ku noolaado.

xaggeed? coll. = xaggee baad?

Berberaad coll. = Berbera baad

noolaado, noolaato subjunctive

59.0

- Boorame ma waxay ka xigtaa Hargeysa xaggay Burco ka xigto?
- Maya. Kama xigto.

xaggay coll. = xagga ay the
direction that | den riktning som

59.1

- Maxaad sheegtay?
- Nabad. Ma Ingiriiska baad ka timid?
- Maya. Waxaan ka imid Maraykanka. Adigu ma Muqdishaad deggan tahay?
- Haahey, **halkanaan** deggan ahay.
- Maxaad ka qabataa halkan?
- Waxaan ahay turjubaan. Adigu ma macallin baad tahay?
- Maya. Waxaan ahay wasiirka difaaca.
- Wallaahi! Magacaygu waa Nuur.
- Barasho wanaagsan.
- Barasho wanaagsan, wasiir.

Muqdishaad coll. = Muqdisho
baad

halkanaan coll. = **halkan**
baan here + I | här + jag

59.2

- Ma Berberaad tagaysaa?
- Haa, immikaan tagayaa Berbera.
- Berbera ma waxay ka xigtaa Hargeysa xaggay Burco ka xigto.
- Maya. Kama xigto. Waxay ka xigtaa waqooyi, Burcana bari bay ka xigtaa.
- Ma Berberaad ku dhalatay?
- Maya. Waxaan ku dhashay Ceerigaabo.
- Xaggay ka xigtaa Ceerigaabo Berbera?
- Waxay ka xigtaa bari.
- Intay u jirtaa?
- Way ka fog tahay.
- Ma boqolaal kiiloomitir bay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa laba boqol iyo lixdameeyo kiiloomitir.

Berberaad coll. = Berbera baad
immikaan coll. = imminka baan

Burcana coll. = Burcona

xaggay? coll. = xaggee bay?

intay? coll. = intee bay?

4.1 Faadumo saaxiibteeda cusub

Cutubkan waxa aad ka akhrin doontaa qoraallo kala duwan ee ku saabsan saaxiibtinnimada.

Inta aadan akhrin ka hor:

Ma jiraan sannadkan carruur cusub fasalkaaga?

Ma isku dayday in aad la saaxiibto?



Carruurta dhigatay dugsiga Faadumo oo dhammi waa ay is yaqaannaan. Inta badan waa ay isla ciyaaraan. Waxa ay **ahaan jireen kuwo faraxsan**.

Maalin ayaa ardayad cusubi oo ka timid xaafad kale ku soo biirtay dugsiga. Qofna kama **aysan aqoon** dugsigeeda cusub.

Waxa ay ahayd gabar xishood badan. Waxa ay u hadlaysay si ka duwan carruurta kale. Aad **uma aysan aqoon** sida wax loo qoro ama loo akhriyo. Carruurta kale waxa ay bilaabeen in ay ka maadaystaan.

cutub -ka *chapter, unit | kapitel, enhet*

qoraal -ka *text*

duwan *odd, unusual | udda, ovanlig*

kala duwan *different, various | olika, varierande*

saaxiibtinnimo -da

friendship | vänskap

inta ... aan ... ka hor *before | innan*

aadan^S < aad + aan = aadan^N *you*

... not | du ... inte

jiraa *exists, is present*

isku dayaa, daydaa *tries | försöker*

la saaxiibaa *becomes friends with sb | blir vän med ngn*

dhigtaa, dhigataa *studies | studerar*

oo dhan, subj. **dhammi** *all*

is each other

yaqaannaa *knows*

inta badan *often, most of the time*

xaafad -da

neighbourhood | grannskap

ku biiraa *joins (an*

organisation) | ansluter sig till

ngt, börjar på skola el. likn.

xishood -ka *shyness | blyghet*

xishood badan *shy | blyg*

u + si *in a manner | på ett sätt*

ka duwan *different*

from | annorlunda än

Had iyo jeer keligeed ayey fasalka dhinac ka fariisan jirtey. Fasaxa quraacda keligeed ayaa ciyaari jirtey. Faadumo waxa ay goosatay in ay la hadasho **gabadha cusub**.



Waxa ay wax ka warsatay qoyskooda iyo xaafaddooda. Waxa ay ku caawisay gabadha shaqo-guriga dugsiga.

Waxa ay bartay **Faadumo gabadhii** walaasheed iyo saaxiibbadeed.

Gabadhii cusbayd ma aysan dareemin cidlo mar dambe. Waxa ay yeelatay saaxiibbo badan.

Ka dooda su'aalahan. U shaqeeya koox-koox.

1. Yaa ah saaxiibbadaa?
2. Maxaa aad samaysaan adiga iyo saaxiibbadaa?
3. Maxaa aysan u lahayn carruurta qaar saaxiibbo?
4. Si aad u yeelataan saaxiibbo maxaa aad samayn kartaan?

ka maadaysataa *makes fun of | g ar narr av*

keligeed *herself, on her own | hon sj lv*

dhinac -a *side; besides | vid sidan om*
fasax -a *break, leave, holiday | rast, ledighet*

quraac -da *breakfast | frukost*

goostaa, goosataa *decides | beslutar (sig)*

warsadaa, warsataa

inquires | fr gar, ber om information, s ker information

xaafad -da

grannskap | neighbourhood

ku caawiyaa *helps with*

baraa, bartaa *1. teaches; 2.*

introduces | 1. undervisar 2.

presenterar, introducerar ngn

dareemaa, dareentaa *feels,*

senses | k nner, upplever

cidlo -da *loneliness | ensamhet*

mar dambe *once more | en g ng*

till, (inte) n gon mera g ng

yeeshaa, yeelataa *obtains,*

acquires, earns | f r

ka doodaa, doodaa

discusses | diskuterar, samtalar

om

Qor qoraal

Faadumo waxa ay qortay qoraalkan gaaban oo ku saabsan saaxiibaddeeda cusub:

Saaxiibaddayda cusub waxa la yiraahdaa Safiyo.
Waxa ay jirtaa toban sano.
Waxa ay ka timid Jowhar.
Waxa ay dugsiiga u qaadataa cambuur buluug ah iyo qimaar cad.
Waxa ay jeceshahay xisaabta.
Waxa ay ku fiican tahay akhriska iyo qorista.
Marka loo baxo fasaxa quraacda, gabdhuhu waxa ay dheelaan kala-xanteysi (taabasho).

qimaar -ka *shoulder-long veil \ axel- eller midjelång slöja, dok*

loo ← la + u
taabasho -da *touch, the act of touching; the name of a game \ vidröring, beröring; namnet på en ringlek*

Axmed waxa uu qoray qoraalkan gaaban oo ku saabsan saaxiibkiisa cusub:

Saaxiibkayga cusub magaciisu waa Mahad.
Waxa uu ku nool yahay meel ii dhow.
Mahad waxa uu dhigtaa fasalka afraad, aniguna waxa aan dhigtaa fasalka saddexaad.
Aniga iyo Mahad marka aan dugsiiga ka imaanno ka dib, waxa aan ciyaarnaa kubbadda cagta.
Waxa aan ku ciyaarnaa garoonka kubbadda cagta.
Mahad waxa uu iga caawiyaa layliyada

ii ← i + u *to me*

marka ... ka dib *after*
imaanno = nimaadno *we come*

garoon -ka *field (from En. ground)*

ku fiican *good at*

shaqo-guriga ah.

Waxa uu ku fiican yahay sayniska.

mid ka mid ah *one of*

Qor qoraal gaaban ee ku saabsan mid ka
mid ah saaxiibbadaa.


Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 1–4

4.2 Saaxiibbo wanaagsan

Inta aadan^S/aanad^N akhrin ka hor:

Weligaa ma jirratey oo dugsiga ma aadi weydey?
Haddii aad jirrato, maxaa ay sameeyaan saaxiibbadaa?

Akhri sheekadan ku saabsan gabar jirran.



Sahro iyo Maryan waa laba gabdhood oo saaxiibbo ah. Labaduba waxa ay dhigtaan dugsi xaafaddooda ku yaal. Mar kasta waxa ay isu raacaan dugsiga.

Sahro keligeed ayaa shaley dugsiga timid. Maryanna waa ay maqnayd. Sahro intii ay dugsiga joogtey oo dhan waxa ay ka walwaleysey waxa ku dhacay saaxiibteed.

Wakhtiga dugsigu markii uu dhammaaday, ayaa ay Sahro degdeg u tagtay gurigii Maryan. Waxa ay ogaatey in ay Maryan bugto oo uu ku dhacay hargab xun.

Sahro markii ay salaantey Maryan ka dib, ayaa waxa ay uga warrantay dugsiga iyo

inta + aan + ka hor innan | before

weligaa you ever
jirradaa, jirrataa blir sjuk,
insjuknar | becomes ill
waayaa cannot, fails
haddii if

ku sabsan about
jirran sjuk | ill

labaduba subjekt (och) de två
också | (and) the two of them as
well

mar kasta alltid, varje
gång | always, every time

isu ← is + u each other + to
raaca accompanies

keligeed (she) alone
shaley -da yesterday

maqan frånvarande | absent
maqnayd hon var borta | she was
absent

intii + oo dhan hela tiden

medan | the whole time when
walwala, **walwashaa** oroar sig
| worries

ku dhacaa happens to sb
ogaadaa, **ogaataa** vet, känner
till | knows

bukaa, **bugtaa** is ill | är sjuk
hargab -ka förkylning, influensa
salaamaa, **salaantaa** hälsar på
warramaa berättar, rapporterar

casharradii maalintaa la soo dhigtay. Dabadeed waxa ay Alle uga bariday in uu siiyo caafimaad degdeg ah. Maryan aabbaheed iyo hooyadeed aad bay Sahro ugu mahad celiyeen.

baryaa, baridaa ber (*om något*) | begs, asks for something

Uga jawaab su'aalahan buuggaaga layliga.

1. Magaceed Sahro saaxiibteed?
2. Maxaa ay Maryan dugsiga u tagi weydey?
3. Sahro xaggee bay aadday markii waqtiga dugsigu dhammaaday?
4. Maxaa ay u sheegtay Maryan?
5. Yaa ay Sahro uga bariday caafimaad Maryan?
6. Maryan aabbaheed iyo hooyadeed maxaa ay ku dhaheen Sahro?
7. Haddii uu saaxiibkaa jirran yahay maxaa aad samayn lahayd?

caafimaad -ka *hälsa* | health

dhahaa, dhahdaa säger | says

U shaqeeya kooxo.

Sameeya masrixiyad ku saabsan saaxiibtinnimo.

masrixiyad -da *teaterföreställning, pjäs* | theatrical play, show

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 16–18

Wadahadallo 60

60.0

- Bulaxaar ma waxay Jabbuuti u jirtaa inta ay Jigjiga u jirto?
- Haa. Jigjigase hoos bay ka xigtaa.

hoos *below, i.e. to the south* | *där nere, dvs. söderut*

60.1

- Xasan, ma Jabbuuti baad ka timid?
- Haa. Laakiin Bulaxaar baan ku dhashay.
- Jabbuuti Bulaxaar xaggee bay ka xigtaa?
- Kor bay ka xigtaa.
- Oo ma waxay u jirtaa inta ay Ceerigaabo u jirto?
- Maya. Ceerigaabona waxay u jirtaa boqolaal kiiloomitir, Bulaxaarna boqol iyo soddomeeyo.
- Ma halkaas baad deggan tahay?
- Maya. Imminka waxaan ku nool ahay Itoobiya.
- Maxaad ka qabataa?
- Waxaan ahay milateri.
- Wallaahi. Oo ma Soomaali baad tahay mise Xabashi?
- Imminka Xabashi baan ahay.
- Itoobiya ma jeceshahay?
- Haa.
- Aabbahaa iyo hooyadaa iyo walaalahaa ma halkaas bay deggan yihiin?
- Haa.
- Anigu waxaan ahay Sawaaxili, laakiin Soomaaliya waan jeclahay.
- Ma Soomaaliya baad ku nooshahay mise Keenya?
- Keenya baan ku nool ahay.
- Ma milateri baad tahay?

kor *above, i.e. to the north* | *där uppe, dvs. norrut*

- Maya. Waxaan ahay askari.
- Ma waxaad jeceshahay in aad Keenya ku noolaato mise in aad Itoobiya ku noolaato mise Soomaaliya?
- Waxaan jeclahay in aan Soomaaliya ku noolaado.

5.1 Dugsigayga

Qor qoraal gaaban.

qoraal -ka *text*

Faadumo waxa ay qortay qoraalkan gaaban ee ku saabsan dugsigeeda.

ku saabsan *about | (som handlar) om*



Dugsigayga waxa la yiraahdaa Dugsiga Hoose/Dhexe ee Basar. Waxa uu leeyahay lix qol, xafiis iyo maqaasiin.

qol -ka *room | rum*
xafiis -ka *office | kontor*

Gidaarka dugsigu waxa uu ka samaysan yahay dhagax. Saqafku waxa uu ka samaysan yahay laamayeeri. Fasalkaygu waxa uu leeyahay afar dariishadood oo waaweyn.

maqaasiin -ka *magasin, förråd | storehouse, warehouse*
gidaar -ka *wall | vägg, mur*
dhagax -a *stone | sten*
saqaf -ka *roof, ceiling | tak*
laamayeeri -ga = jiiingad -da
korrugerad plåt | corrugated metal sheets

Magaca maamulahaygu waa Mudane Cali Cadow. Macallinka af-Soomaaliga ii dhiga waa Mudane Cabdi Maxamed.

mudane -ha *mister, gentleman | herre*
ii < *i+u *to me*

Qor qoraal gaaban ee ku saabsan dugsigaaga.

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 22

5.2 Fasalka Faadumo

Kani waa sawirka fasalka Faadumo.

Xaggee bay fariisataa? Isku aaddi tirada iyo magacyada.



Cusmaan waxa uu dhinac fariistaa Maxamed.

Safiyo waxa ay dhinac fariisataa Aamina.

Ibraahim waxa uu fariistaa Cumar iyo Xaliima dhexdooda.

Xuseen waxa uu fariistaa Cumar iyo Cali dhexdooda.

Cabdulle waxa uu fariistaa Cumar gadaashiisa.

Faadumo waxa ay fariisataa Aamina horteeda.

Ma run baa?

fariistaa, fariisataa *sits | sitter, sätter sig*

isku aadiyaa *brings together, combines | för samman*

Cusmaan = 4

Safiyo =

Ibraahim =

Xuseen =

Cabdulle =

Faadumo =

dhinac -a *side | sida*

dhexdooda *between them | mellan dem*

gadaal -sha *back, rear | baksida*
gadaashiisa *behind him | bakom honom*

hor -ta *front | framsida*
horteeda *in front of her | framför henne*

run -ta *truth | sanning*

Falkaab-meeleed

Falkaab-meeleedyadu waxa ay inoo sheegaan meesha uu qof ama shay yaallo.

Guuri weerahan.

Hoos ka xarriiq falkaab-meeleedyada ku jira.

1. Faadumo waxa ay ku nooshahay Baydhabo dhexdeeda.

2. Gurigeedu waxa uu dhanka hore uga yaal dugsi.

3. Halkaas waxa ah dukaan dhinac yaal gurigeeda.

4. Aabbaheed waxa uu ka dhex shaqeeyaa dukaan.

5. Isagu waxa uu iibiyaa waxyaabaha kor saaran iskafaallada dukaanka.

falkaab -ka *adverbial*

falkaab-meeleed -ka *rumsadverbial, platsadverbial* | *adverbial of place*

shay -ga *thing* | *ting*

guuriyaa *copies* | *kopierar*

hoos -ta *underside* | *undersida*

xarriiqaa *draws a line* | *drar ett streck*

dhex -da *inside* | *insida*

dhexdeed *inside it* | *inuti den*

dhan -ka *riktning, sida* | *direction, side*

dhanka hore *front* | *framsida*

wax -a, pl. **waxyaabo** -ha

thing | *sak*

kor -ka *surface, upper side* | *yta, ovansida*

saaran *positioned, put* | *placerad, lagd*

iskafaale -ha *shelf* | *hylla*

Xaggee fariisataa?

Qor shan weerood ee ku saabsan saaxiibbadaa.

Sheeg meesha ay ka fariistaan fasalka.

Hoos ka xarriiq falkaab-meeleedyada ku jira qoraalkaaga.

Tusaale: Faadumo waxa ay fariisataa

Aamina horteeda.

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 23–24

Wadahadallo 61

61.0

- Immisa carruur baad leedahay?
- Waxaan leeyahay toddoba carruur ah.

61.1

- Bishani waa tuma?
- Waa Ogost.
- Immisadii Ogost weeye?
- Waa siddeedii Ogost. Xaggeed tagaysaa?
- Waxaan tagayaa Muqdisho.
- Hadma?
- Bishan laba iyo tobankeeda.
- Ma reer Muqdishaad tahay?
- Haa. Waxaan ahay reer Muqdisho. Waxaan leeyahay carruur oo iyana Muqdishay deggan yihiin.
- Immisa carruur ah?
- Toddoba carruur baan leeyahay.

tuma / kuma *which|vilken*

xaggeed ← xaggee baad

Muqdishaad ← Muqdisho
baad

iyana ← iyaguna
Muqdishay ← Muqdisho bay

61.2

- Maxaad sheegtay?
- Nabad. Iska warran.
- Nabad. Xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Burco.
- Ma reer-miyi baad tahay mise reer-magaal?
- Waxaan ahay reer-magaal.
- Burco maxaad ka qabataa?
- Waxaan ahay askariyad.
- Immisa carruur ah baad leedahay?
- Waxaan leeyahay lix carruur ah.
- Wallaahi! Oo immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay shan iyo afartan jir.
- Anigu waxaan ku dhashay Ceerigaabo, laakiin immika Hargeysaan deggan ahay.

xaggeed ← xaggee baad

immika = imminka
Hargeysaan ← Hargeysa baan

- Ceerigaabo Hargeysa miyay ka fog tahay?
- Haa. Boqolaal kiiloomitir bay u jirtaa.
- Xaggee bay ka xigtaa?
- Waxay ka xigtaa waqooyi.
- Booramana?
- Iyana waxay ka xigtaa xagga waqooyi.


**Booramana ← Boorame+na
iyana ← iyaduna**

6. Deriskeenna

Qaybta 2aad

Duqayda

Duqaydu waxa ay ka mid yihiin hoggaamiye-dhaqameedyada bulshada. Waa dadka ugu muhiimsan deriska. Iyagu waxa ay ilaaliyaan ammaanka deriska.



Wixii dhibaato ah ee ay xallin kari waayaan waxa ay u gudbiyaan Suldaanka, Boqorka ama Ugaaska iyo duqayda kale.

Ehelkaaga cidi ma ku jirtaa duqayda deriska?

Sidee baa ay dadka deriskaagu u doortaan duqayda?

Ugu ^{yeedha}yeera mid ka mid ah duqayda in uu yimaaddo fasalkiinna. Weydii in uu idiinka warramo shaqada duqayda deriskiinna.

duq -a *gammal (klok) man* | old (wise) man

duqay -da *de byäldsta* | (council of) elders

hoggaamiye-dhaqameed -ka *social och kulturell ledare* | social and cultural leader

muhiimsan *viktig* | important

ammaan -ka *lugn, säkerhet* | peace, security

wixii saker som... | things that...

dhibaato -da *svårighet, problem* | difficulty, problem

xalliyaa *löser* | solves

waayaa *kan inte,*

misslyckas | cannot, fails

u gudbiyaa *lämnar vidare, vidare-*

befordrar till ngn | passes on to sb

suldaan -ka *sultan*

boqor -ka *kung* | king

ugaas -ka *härskare* | chief

ehel -ka ^{Ar.} *släkt* | relatives

cidi subject form *någon* | someone

doortaa *väljer, utser* | chooses, elects

yeeraa/yeedhaa¹ *ropar, tillkallar,*

ber ngn komma | shouts, calls for

sb, asks sb to come

idiinka < *idin+u+ka er+för+om,*

you+to+about

warramaa *rappporterar* | reports

¹ In the texts, the northern form is on top and the southern form below.

Booliska

Ibraahim waa nin boolis ah. Waxa uu ka shaqeeyaa saldhigga booliska ee ku yaalla deriska Saynab.

Ibraahim waxa uu ^{xidhaa}xirtaa labbiska booliska Soomaaliyeed ee kaakiga ah iyo koofiyad madow.

Ibraahim waxa uu mas'uul ka yahay ammaanka deriska. Maalin kasta isagu waxa uu ku soo wareegaa deriska. Dadku waxa ay u sheegaan dhibaataada haysata.

Ka dib Ibraahim waxa uu isku dayaa in uu soo helo ciddii ku kacday waxyaabo xun.

Ibraahim waxa uu qabtaa dadka xun, waxa ^{aanu uuna} hor geeyaa maxkamad.



Mararka qaarkood Ibraahim waxa uu qabtaa shaqada ciidanka waddada.

Waxa uu kala haggaa baabuurta.

Waxa kale oo uu isagu ku caawiyaa dadka deriska in ay waddada uga gudbaan si nabad ah.

boolis -ka polis | police

nin boolis ah polisman | policeman
saldhig -ga station, bas

xirtaa, xirataa/xidhaa, xidhataa
har på sig, tar på sig | wears,
dresses in

labbis -ka kläder | clothes

kaaki -ga khakifärg | khaki colour

koofiyad -da mössa | cap

mas'uul -ka ansvarig person |
responsible person

wareegaa går runt | walks around
haystaa besvärar | troubles

isku dayaa försöker, anstränger
sig | tries, makes an effort

cid -da folk | people

ku kacaa gör, utför | does, makes

aanu/uuna < uu+na han+och |
he+and

hor inför | in front (of)

geeyaa för, tar | takes somewhere

maxkamad -da domstol | court

qabtaa utför | carries out

ciidan -ka styrkor, armé | forces,
army

waddo -da väg | road

ciidanka waddada trafikpolis |
traffic police

kala åt olika håll | in different
directions

haggaa dirigerar, leder, visar
vägen | leads, guides

ka gudbaa går över ngt | crosses sth,
goes across sth

uga <- u+ka

u + si på ett sätt | in a manner

Adiga deriskiinnu ma leeyahay nin boolis ah?

kiinna er|yours

Waa in aynu gacan ku siinnaa booliska ilaalinta sharciga iyo ammaanka.

gacan ku siiyaa ger en hjälpande
hand med ngt|gives a helping
hand with sth

Soo booqo saldhig boolis haddii uu ka jiro deriskiinna.

siinna vi ger|we give
sharci -ga lag|law
booqdaa besöker

Soo ogow bal shaqada ay qabtaan boolisku, haddii uu deriskiinna ku yaallo saldhig boolis.

ogaadaa får veta|gets to know
soo ogaadaa tar reda på|finds out

Qor inta shaqo ee ay qabtaan boolisku.

Ciidanka dabdemiska


Guuleed waxa uu ka tirsan yahay guutada dabdemiska. Waxa uu ^{xidhaa} xirtaa dirays madow.

dab -ka eld|fire
damis/demis -ka
släckning|extinguishing
guuto -da grupp, kår|group, squad
dirays -ka uniform

Guuleed waxa uu ka shaqeeyaa saldhigga dabdemiska ee magaalada.

Saldhigga dabdemiska waxa yaalla telefoon. Dadku waxa ay telefoon u diraan saldhigga dabdemiska marka ay dab arkaan.

telefoon u diraa ringer till|calls
somewhere



Guuleed waxa uu wadaa baabuur dabdemis oo weyn oo midab cas leh. Baabuurka dabdemisku waxa uu leeyahay taangi biyood

wadaa kör|drives
taangi -ga tank
biyood adj. vatten-|water

oo weyn. Ragga dabdemisku waxa ay isticmaalaan biyo ay dabka ku demiyaan.

Ragga dabdemisku waxa ay adeegsadaan jaranjaro ay ku gaaraan dadka ku xannibma gudaha dhismaha dheer ee gubanaya.

Guutada dabdemisku waxa ay ka shaqeeyaan magaalooyinka waaweyn dhexdooda.

Tuulada kuma hayasanno ciidanka dab-demiska.

Maxaa ay sameeyaan deriskiinnu marka dab uu meel qabsado?



U shaqeeya kooxo.

Qor walxaha keeni kara in dab qabsado meel.

Maxaa ugu habboon ee aad samayn lahayd haddii aad aragto:

– qof dharkiisu dab qabsaday,

– birdaawe dab qabsaday,

– guri dab qabsaday.

isticmaalaa = adeegsadaa

använder | uses

jaranjaro -da = sallaan -ka

stege | ladder

gaaraa/gaadhaa *nå (fram) till ngn |*

reach sb

xannibmaa *befinner sig i nödläge |*

finds oneself in an emergency

situation

gude -ha *insida | inside*

dhisme -ha *byggnad | building*

gubaa *eldar, bränner | burns (tr)*

gubtaa *brinner | burns (intr)*

ma haysanno *vi har inte | we don't*

have

dab wuu qabsadaa *det tar eld | sth*

catches fire

meel *någonstans | somewhere*

keeni karaa *kan medföra | may lead*

to, may cause

habboon *lämpligt | suitable*

lahayd *borde | should, ought to*

birdaawe -ha/birdaawo -da

stekpanna | frying pan

Dhakhtarrada

Maryan waa dhakhtarad.

Waxa ay ka shaqaysaa isbitaalka Saynab deriskooda.



Waxa ay ^{baadhaa}baartaa dadka buka, ka dibna waa ay daweyso.

Maryan waxa kale oo ay daryeeshaa hooyada iyo ilmaha ay dhasho.

Waxa ay kala talisaa hooyada sida ay u daryeelayso ilmaha.



Ilmuhu waxa uu u baahan yahay in la mudo si looga tallaalo cudurro halis ah.

Dhakhtaradda Maryan waxa ay ilmaha ku muddaa irbado.

baaraa/baadhaa *undersöker* | examines, investigates

bukaa, bugtaa *är sjuk* | is ill
daweeyaa *behandlar* | treat (medically)

daryeela *vårdar* | cares for
dhalaa, dhashaa *föder* | gives birth

kala taliyaa *ger olika råd* | gives various types of advice

sida ... u hur, sättet på vilket | how, the manner in which

mudaa *sticker, injicerar* | pierces, injects

si + u för att | in order to

looga <- la+u+ka

ka tallaalaa *vaccinerar mot* | vaccinates against

cudur -ka *sjukdom* | disease

halis -ta = khatar -ta *fara* | danger

irbad -da *nål, spruta* | needle, syringe

Barayaasha

bare -ha = macallin -ka

Aamina waa macallimadda Saynab.

Waxa ay bartaa iyada habka akhriska iyo qorista.

baraa *lär* | teaches

hab -ka *sätt, metod* | way, manner, method



Barayaashu kaalin muhiim ah baa ay kaga jiraan bulsho kasta.

kaalin -ta *roll* | role

Walxo badan ayaa aynu ka barannaa barayaasha. Barayaashu waxa ay la mid yihiin waalidka.

walax -da, pl. walxo *sak* | thing

bartaa, barataa, barannaa *lär sig* | learns

la mid *lik, (samma) som* | similar, equal, like, the same as

waalid -ka *förädrapar* | a couple of parents

Waxa ay ina baraan akhlaaqda wanaagsan.

akhlaaq -da *uppförande, uppträdande* | behaviour, manners

Adigu ma raacdaa waanada barahaaga?

raacaa *följer* | follows

Ma ixtiraamtaa barahaaga?

waano -da *råd, anvisning* | advice, directions

ixtiraamaa *visar respekt* | shows respect

Duqeyda, culimada diinta, booliska, dhakhtarrada iyo barayaashu waxa ay deriska u hayaan shaqo waxtar leh.

culimo -da *coll. lärda* | scholars

waxtar -ka *nytta* | use, benefit

Waa in aynu maqalnaa oo ixtiraamnaa taladooda.

maqalaa *lyssnar* | listens

talo -da *råd, beslut* | advice, decision

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010 & Muqdisho 2001: 8, 11–16

Wadahadallo 62

62.0

- Xaas miyaad leedahay?
- Haa, xaas waan leeyahay.
- Saaxiibkaana?
- Ma laha.

xaas -ka *fru (och barn)|wife (and children)*

ma laha *har inte|hasn't got*

62.1

- Waryaa Jaamac! Ninkaasi ma Maraykan baa mise waa Ingiriis mise waa Ruush?
- Waa Ruush.
- Muxuu ka shaqeeyaa?
- Waa macallin. Adigu maxaad qabataa?
- Waxaan ahay reer-miyi. Magaaladee baad ku nooshahay?
- Waxaan deggan ahay Muqdisho.
- Oo Muqdisho ma xagga ay Hargeysa ka xigto ayay Booramana ka xigtaa.
- Haa, xaggaas bay ka xigtaa.

62.2

- Ninkaasi ma walaalka baa?
- Maya, waa aabbahay.
- Wallaahi, oo waa immisa jir?
- Waa afartan jir.
- Adiguna immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay laba iyo labaatan jir.
- Ma arday baad tahay?
- Haa.
- Ma Hargeysa baad deggan tihiin?
- Maya, laakiin imminka baan tagayaa.
- Ceerigaabo ma bari bay ka xigtaa mise galbeed?
- Waxay ka xigtaa koonfur.
- Ma xaggaas Muqdisho ka xigto Ceerigaabo?

jir = sano *år|year*

- Haahey.
- Xaas miyaad leedahay?
- Haa, waan leeyahay.
- Saaxiibkaana xaas ma leeyahay?
- Maya, ma laha.

7.1 Ciyaarta kubbadda cagta

Inta aadan akhrin sheekadan ka hor.

Ciyaartee baad jeceshahay in aad la ciyaartid saaxiibkaa?


Waqtiyada aadan joogin dugsiga marmar ma ciyaartaa ciyaarta kubbadda cagta?

Akhri sheekadan ku saabsan saaxiibbo jeclaa in ay ciyaaraan kubbadda cagta.

* * *

Xasan iyo saaxiibkiis waxa ay jeclaayeen in ay ciyaaraan kubbadda cagta. Galab kasta garoonka kubbadda cagta ayaa ay tegi jireen oo ay ku ciyaari jireen. Hase yeeshee maalin iyaga oo garoonka ku sii socda ayey maqleen onkod roob.

Waa ay istaageen, waxa ayna ka baqeen in uu roob helo haddii ay garoonka tagaan.



Xasan oo madaxa ruxaya ayaa yiri, "Maanta in aynu kubbadda cagta ciyaarno aad bay u fiican tahay, laakiin haddii aynu garoonka tagno waxaa hubaal ah in uu roob nagu di'i

inta ... aan ... ka hor innan (eg. *medan inte ...*

dessförinnan) | before (lit. as long as not ... before)

aadan^s / aanad^N du/ni inte | you not **ciyaaraa** plays | leker, spelar

joogin reduced subj. is | är, *befinner sig*

jeclaa < *jecel+ahaa

jeclaayeen < *jecel+ahaayeen **galab -ta** afternoon | eftermiddag

garoon -ka ground | plan, fält

jireen used to

hase yeeshee dock | however, *nevertheless*

onkod -ka åska | thunder

onkod-roob -ka

åskväder | thunderstorm

istaagaa, istaagtaa stoppa,

stanna | stop, stand

baqaa, baqdaa blir rädd | gets *frightened*

ruxaa, ruxdaa skakar | shakes

hubaal -sha något säkert | some-
thing certain

waxaa hubaal ah in ... Det kommer säkert att... | It is (almost) *certain that...*, It will most probably...

nagu < na + ku oss + på | us + on **di'i** inf. av **da'aa** rains | regnar

doono. Markaa aniga waxa ay ila tahay in aynaan maanta ciyaari karin oo aan iska dhaafno."

Dabadeed wiil kale oo Cali la yiraahdo ayaa hadlay oo yiri, "Aniga waxa ay ila tahay in aynaan maanta ciyaarta dhaafin ee aan iskaga ciyaarno bannaankan inoo dhow ee waddada baabuurta agteeda ah."

Wiilashii dhammaantood waxa ay isku raaceen ra'yigaas Cali.

Waxa ay bilaabeen in ay ku ciyaaraan bannaanka u dhow waddada baabuurta agteeda. Cabbaar markii ay ciyaartii socotay ayaa ay kubbaddii ka fakatay oo ay u tallawday waddadii baabuurta. Xirsi ayaa ka daba cararay.

Markii uu kubbaddii gaarey ee uu gacanta ku dhigay ayaa baabuur aad u ordaya meel dhow kaga soo baxay.



Xirsi markii uu arkay gaarigii oo in yar u soo jira, ayaa uu naxay oo uu hadba gees u cararay.

markaa *då, sedan* | then
waxa ay ila tahay in... *jag tycker att ... (eg. saken är med mig att...)* | I think that... (lit. the thing is with me that...)

aynaan < *aynu+aan
iska dhaafaa, dhaaftaa *låter bli, hoppar över* | skips
iskaga < *is+ku+ku *tillsammans ... på* | together ... at
isku < is + ku *tillsammans* | together
waddo -da *väg* | road
ra'yi -ga *idé, förslag* | idea, proposition

cabbaar -ka *en stund* | instant, short while
marka / markii *när* | when
fakadaa, fakataa *flyr, undkommer* | flees, escapes
u tallaabaa, tallawdaa *passerar ut på* | pass onto
daba (particle) *efter, bakom* | after, behind
cararaa, carartaa *rusar, springer (i väg), flyr* | runs (away), rushes, flees

gaarí / gaadhí -ga *bil* | car
hadba *genast* | immediately
gees -ka *kant, hörn* | edge, corner

Wadihii gaariga naftiisu waa uu naxay oo hadba dhinaca Xirsi u cararo ayaa uu baabuurkii u leexinayey. Ugu dambeynna baabuurkii wiilkii ayaa uu jiirsiiyey. Isla markiibana isbitaalka ayaa loola cararay Xirsi.

naftiisu *han själv* | he himself
leexiyaa, leexisaa *svänger* | turns, diverts

jiirsiiyaa, jiirsiisaa *kör på (med ett fordon)* | runs over (with a vehicle)

loola < ***la+u+la** *man + till + med* | one + to + with

Xirisi ma ciyaari karo kubbad sababtoo ah lug ayaa si xun uga jabtay. Waxa uu samayn karaa oo keliya in uu fariisto oo uu fiirsado marka kubbadda la ciyaarayo.

sabab -ta *orsak* | reason
sababtoo ah *eftersom* | because
ka jabaa, jabtaa *går av för ngn* | breaks for sb

Su'aalahan uga jawaab buuggaaga layliga.

1. Maxaa ay wiilashu jeclaayeen in ay sameeyaan marka ay dugsiga ka yimaadaan?

2. Wiilashu inta badan xaggee bay ku ciyaari jireen?

3. Midkee taladiisu fiicnayd, Xasan ama Cali?

talo -da *råd, förslag, beslut* | advice

4. Maxaa ay u fiicnaan weyday in lagu ciyaaro kubbadda waddada ama meel u dhow?


fiicnaan < ***fiican+ahaan** *be good*
weeyaa *fails* | misslyckas

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 26–28

7.2 Diin

Maxaa aad ka taqaan diin? Akhri qoraalkan gaaban. Dabadeed ka jawaab su'aalahan.


1. Xaggee buu ku nool yahay diinku?
2. Diinku ma nolol dheer yahay mise waa nolol gaaban yahay?
3. Maxaa uu cunaa?



Dalkeenna waxa ku nool diin badan. Waxa ay ku nool yihiin meelaha dhagaxa badan ee duurka dhexdiisa ah.

Diinku waxa uu leeyahay qolof adag. Marka uu diinku arko cadowgiisa waxa uu laabaa qoortiisa. Dabadeed waxa uu joojiyaa dhaqdhaqaaqa.

Waxa uu iska dhigaa dhagax oo kale. Waxa uu filayaa in cadowgiisa uusan arag.



taqaan *you know* | *du vet*

nool *living* | *levande*

nolol -sha *life* | *liv*

dhagax -a (mass) *stone(s)* | *sten(ar)*

duur -ka *vildmark, skog* | *wilderness, forest*

qolof -ta *skal* | *shell*

cadow -ga *fiende* | *enemy*

laabaa, laabtaa *böjer, viker* | *bends, folds*

qoor -ta *hals* | *neck*

joojiyaa *stoppar* | *stops something, makes something stop*

dhaqdhaqaaq -a *rörelse, förflyttning* | *movement*

iska dhigaa, dhigtaa *lätsas (vara)* | *pretends to be*

oo kale *lik, som* | *as, like, similar to*

filaa, fishaa *tror, hoppas* | *believes, hopes*

uusan = aanu < ***uu+aan** *han inte* | *he not*

arag *reduce subj. of arkaa såg* | *saw*

Diinku waxa uu noolaan karaa waqti dheer. Sida la yiri qaar ayaa waxa ay noloshoodu gaartaa 150 sano. Kuwaasina aad bay u waaweyn yihiin.

noolaan < *nool+ahaan *leva* | *be*
alive, live
qaar -ka *del* | *part*
gaaraa, gaartaa *nâr* | *reaches*

Diinku waxa uu leeyahay lugo gaagaaban. Waxa uu u socdaa si aayar ah. Waxa uu cunaa caws badan.

aayar *något långsamt, ett långsamt sätt* | *something slow, a slow manner*

Xilliga jiilaalka ah diinku waxa uu galaa geedaha hoostooda. Taas macnaheedu waxa ay tahay, diinku waxa uu hurdi karaa laba bilood.

xilli -ga *årstid* | *season*
jiilaal -ka *dec-feb* | *Dec-Feb*
galaa, gashaa *går in, komer in* | *enters*
hoos -ta *undersida* | *underside*
hoostooda *under (dem)* | *under (them)*

Diinku inta badan ma sameeyaan wax dhaqdhaqaaq ah waxna ma cunaan.

macne -ha *meaning* | *mening, innebörd, betydelse*
hurdaa, **huruddaa** *sleeps* | *sover*

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001:29–30

Wadahadallo 63

63.0

- Wax carruur ah ma leedahay?
- Maya, wax carruur ah ma lihi.
- Walaalkaana?
- Wuu leeyahay.

63.1

- Ma Ingiriis baad tahay mise Maraykan?
- Waxaan ahay Maraykan.
- Magaaladee baad ku nooshahay immika?
- Waxaan ku nool ahay Burco.
- Maxaad ka qabataa?
- Macallin baan ahay immika, laakiin
Nofeembar baan Maraykanka tagayaa.
- Ma aabbahaa iyo hooyadaa baa
Maraykanka ku nool?
- Haa.
- Wax carruur ah ma leedahay?
- Haa, waxaan leeyahay laba hablood iyo
inan.
- Walaalo ma leedahay?
- Haa, inan iyo inan baannu walaalo nahay.
- Iyana ma carruur bay leeyihiin?
- Maya.

63.2

- Inantaasi ma Ceerigaabo bay ka timid?
- Haa, laakiin immika waa reer Burco.
- Magaceed?
- Waa Xaliimo magaceedu.
- Ma walaalo baad tihiin?
- Maya, laakiin aniguna reer Burco baan
ahay. Iyaduna waa macallimad, aniguna
macallin baan ahay.

- Adigu ma leedahay carruur?
- Inan baan leeyahay.
- Hadma dhashay?
- Wuxuu dhashay laba kun iyo kow iyo tobankii.
- Oo kolkaas waa toban jir.
- Haa.
- Adiguna immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay afartan jir.

8.1 Diin iyo bakayle

U shaqeeya kooxo afar-afar ah. Qof waxa uu noqonayaa wariye, midna bakayle, midna diin, kan afraadna daanyeer.



Wariye: Beri hore ayaa waxa isu faanay diin iyo bakayle, waxana dhex martay dooddan soo socota.

Diin: War bakayle, ma ila tartami kartaa?

Bakayle: Ma aniga ayaad i leedahay "Ma ila tartami kartaa?"

Diin: Haa. Adiga naftaada ayaan ku leeyahay.

Bakayle: War diinow, aniga ilama tartami kartid ee aamus, ceebtaada yaan cid kale ku maqlinee.

Diin: Bakaylow, aniga igama dheerayn kartid, ee aan isula tagno cid kale ee ina tartansiisa.

noqdaa, noqotaa, progr.

noqonayaa *blir* ▪ becomes

wariye -ha *reporter, berättare* ▪ reporter, storyteller

beri -ga *en gång (i det förflutna)* ▪ once (in the past)

isu *för varandra* | to each other

u faanaa *skryter för ngn* ▪ boasts, brags to sb

dhex maraa *passerar, utspelar sig* | passes, takes palce

dood -da *diskussion* ▪ discussion

soo socda, socota *följande* ▪ following

war! *hallå, hördu* ▪ hey

tartamaa *täolar* ▪ competes

leeyahay, leedahay *säger* ▪ says

naf -ta *liv, själ* ▪ life, soul

naftaada *du själv, just du* ▪ yourself

aammusaa *är tyst* ▪ is quiet

ee så ▪ so

ceeb -ta *skam* ▪ shame, disgrace

yaan < **yaa** + **aan** *må + inte* ▪ may + not

maqlinee < **maqlin** + **ee**

dheereeyaa *springer snabbt* | runs fast

aan tagno *låt oss gå* | let's go

isula *with each other to*

Bakayle: War diinow, aniga ilama tartami kartid ee waxa aan ku leeyahay: iska joog!

iska joog! håll dig borta! försvinn! ▪
stay away! keep away!

Diin: Ma aniga ayaad sidaas i leedahay? Car, haddii aadan baqayn, inoo gee daanyeerka halkaa jooga.

car! kom an! ▪ I dare you
geeyaa för ▪ leads

Bakayle: Daanyeerow, waxa aan doonaynaa in aad tartankeenna garsoore nooga noqtid.

garsoore -ha domare ▪ judge
nooga < *na+u+ka at oss avseende |
for us regarding

Daanyeer: Tani waa mid aan caadi ahayn, laakiin waan idinka oggolaaday. Waxa aan carrada idiinku dul sawirayaa meel uu tartanka ku dhammaado. Midka idiinku soo hormara ee gudba meeshaas ayaa badiyey. Diyaar ma tihiin? Kow, laba, saddex, baxa.

caadi -ga något normalt, vanligt ▪
something normal
aan ahayn (som) inte är | (that) isn't
ka oggolaadaa säger ja till ngt, går
med på ngt ▪ agrees to sth
carro -da jord ▪ soil
soo hormaraa kommer först ▪
arrives first

Bakayle: Hah, looma baahna in aan dheereeyo. Si fudud ayaa aan u guulaysan karaa. Bal marka hore aan hurdo yar la dhaco.

gudbaa passerar ▪ passes
badiyaa vinner ▪ wins
diyaar -ka (att vara) färdig, redo ▪
(to be) ready, readiness
hah! oj!, usch!, fy! ▪ oh dear!
(dismay)
u baahan yahay in har behov av
att ▪ feels a need to



dheereeyaa springer snabbt ▪ runs
fast
fudud lätt ▪ easy, light
guulaystaa, guulaysataa, inf.
guulaysan vinner ▪ wins
bal bara, helt enkelt ▪ just, simply
hurdo la dhacaa faller i sömn ▪
falls to sleep

Wariye: Bakaylihii hurdo ayaa uu la dhacay. Laakiin diinkii ma uusan seexan. Diinkii waxa

seexdaa, seexataa, inf. seexan
lägger sig att sova ▪ goes to sleep

uu iska sii watay socodkiisii gaabnaa ilaa u gaaro meeshii dhammaadka.

sii prticle *fortsätta göra* ▪ continue doing

gaaban *långsam* | slow

socod -ka *promenad* | walk

kacaa *waknar* | wakes up

boodaa *hoppa* | jumps

si dhaqso leh *snabbt* | quickly

goob -ta *plats* | place

Bakaylihii markii uu kacay, kor ayaa uu u booday oo si dhaqso leh ayaa uu ugu orday goobta orodku ku dhammaado. Laakiin aad buu u daahay. Diinkiina waxa uu ordaba, waxa uu gaarey meeshii loo tartamayey. Taasina waa sida uu diinku uga guulaystay bakaylihii tartankii orodka ahaa.

daahaa *kommer för sent* ▪ is late

waxa uu ordaba *han springer och springer* | he keeps on running

ka guulay-staa -sataa *vinner över ngn* | wins over somebody

Uga jawaab su'aalahan buuggaaga layliga.

1. Xayawaankee baa doonayey in lala tartamo?

lala *man...med* | one...with

2. Xayawaankee baa rumaysnaa in uu tartanka ku badinayo?

rumaysan *övertygad* | convinced

3. Xayawaankee baa u ahaa labada xayawaan garsoore ciyaareed?

4. Xayawaankee baa dhex ku sii hurday?

5. Xayawaankee baa sii watay orodkiisii?

6. Xayawaankee baa ku guulaystay orodkii?

* * *

Diinkii ayaa waxa uu doonayey in uu bakaylihii ku marti-qaado in uu la tartamo.

marti -da *gäster* | guests

qaadaa *tar* | takes

ku martiqaadaa *inviterar, bjuder in ngn till ngt* | invites sb for sth

Walaal Bakayle,

Waxa aan jeclahay in aan kugu marti-qaado in aad ila tartanto galabta Sabtiga ah, saacaddu marka ay tahay 3da galabnimo.

Waxa aan rajaynayaa in aan kula kulmo.

rajeeyaa *hoppas* ▪ *hopes*
kula *med dig* ▪ *with you*
la kulmaa, kulantaa *träffar ngn* ▪
meets with sb

Nabadgelyo,
Mudane Diin.

mudane -ha (*bästa*) *herre* ▪ *mister*

* * *

Maxaa aad jeceshahay in aad ku marti-
qaaddo saaxiibkaa in uu sameeyo?

In uu ciyaaro kubbadda cagta?
In uu yimaaddo dugsiigaaga?
In uu soo booqdo qoyskiinna?

U qor saaxiibkaa qoraal gaaban oo marti-
qaad ah.

gaaban *kort* ▪ *short*

Halxiraalayaal

halxiraale -ha *gåta* ▪ *riddle, puzzle*

Weydii saaxiibkaa su'aalahan.

1. Waxa aan leeyahay shaaribo.
Waxa aan cunaa doolliga.

shaarib -ta *morrhår* ▪ *wisker*
doolli -ga = jiir -ka *råtta, mus* | *rat,*
mouse

b. Waxa aan ahay eey.
t. Waxa aan ahay bisad.
j. Waxa aan ahay dawaco.

eey = ey -ga *hund* | *dog*

2. Anigu waan cad ahay.
Waxa aan ku dhex jiraa afkaaga.
Waxa aad ii isticmaashaa in aan waxyaalo
qaniino.

qaniinaa *biter* ▪ *bites*

b. Waxa aan ahay carrab.
t. Waxa aan ahay ciddi.
j. Waxa aan ahay ilig.

carrab -ka *tunga* ▪ *tongue*
ciddi -da *nagel, klo* ▪ *nail, claw*

3. Anigu waan ifaa maalintii.

Waxa aan ku aallaa cirka dhexdiisa.

Waxa aan leeyahay qaabab kala duwan.

b. Waxa aan ahay dab.

t. Waxa aan ahay faynuus.

j. Waxa aan ahay qorrax.


ifaa, iftaa *lyser, skiner* ▪ *shines*
qaab -ka, pl. **qaabab** *form* ▪ *form*
kala duwan *olika* ▪ *different*

faynuus -ka *lykta* | *lantern*
qorrax -da *sol* ▪ *sun*

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 33–37

8.2 Magacyo

U sheeg macallimaddaada shay fasalka dhex yaal ee aad arki kartid, aadna taaban kartid.



magac -a *namn, substantiv* | name,
noun

shay -ga *object, item* | föremål
taabtaa, taabataa *vidrör* | touches

Waxyaabahaas oo dhammi waxa ay leeyihiin magacyo.

dhan, subj. **dhammi** *alla* | all

Ka raadi magacyada.

U shaqeeya laba-labo.

Ma ka heli kartaa qoraalkan gaaban shan magac?

Nin ayaa ka helay kaynta daanyeer.

Daanyeerka hooyadii waxa toogatey ugaarsato.

Ninkii waxa uu u qaaday daanyeerkaa yaraa gurigiisa.

toogtaa, toogataa *shoots* | skjuter

Hoos ka xarriiq magacyada.

Guuri weerahan. Dabadeed hoos ka xarriiq saddex iyo toban magac ee ku jirta.

1. Daanyeerku waxa uu aad u jeclaa ninkii lahaa.
2. Ninka saaxiibbadiis ma jeclayn daanyeerka.
3. Duqsi ayaa ninka wejiga uga istaagey.
4. Daanyeerkaa waxa uu soo qaaday dhagax si uu ugu dhufto duqsigii.
5. Daanyeerkaa sidoo kale waxa uu dilay ninkii lahaa.

hoos + ka *underifrån* | from below
xarriiq -da *streck* | line
xarriiqaa *drar ett streck* | draws a line

ku dhuftaa, dhufataa *hits S with S | slår N med N*

Samaynta weero.

Geli magacyadan weero.

1. xayawaan
2. kayn
3. saaxiib
4. duqsi
5. walaal
6. hooyo

Wadar

Magacyadu waxa ay noqon karaan wadar ama keli.

Qor wadarta magacyadan.

daanyeer, kayn, ugaarsade, nin, saaxiib, guri, dhagax, duqsi

wadar -ta *plural*
keli -da *singular*

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 13–14

Wadahadallo 64–65

64.0

- Maanta waa ayaanma?
- Maanta waa Arbca.

64.1

- Cali, ma waxaad tagaysaa Bulaxaar?
- Haa, Bulaxaaraan tagayaa maanta.
- Maanta waa ayaanma?
- Waa Arbaca maanta.
- Wax carruur ah ma leedahay?
- Maya, ma lihi wax carruur ah.
- Walaalo ma leedahay?
- Mid baan leeyahay.
- Walaalkaa xaas ma leeyahay?
- Haa.
- Wax carruur ahse?
- Laba inan buu leeyahay.

Bulaxaaraan < Bulaxaar baan

64.2

- Xasan, iska warran.
- Nabad! Maxaad sheegtay?
- Nabad! Ma Hargeysaad tagaysaa?
- Maya. Baraawaan tagayaa maanta.
- Ma xaaskaagaa deggan Baraawe?
- Haa.
- Carruur ma leedahay?
- Haahey.
- Immisa?
- Waa saddex inan iyo laba hablood.

Hargeysaad < Hargeysa baad

Baraawaan < Baraawe baan

xaaskaagaa < xaaskaaga baa

65.0

- Berri ma Sabti baa?
- Maya. Shalay bay ahayd Sabti. Berrina waa Isniin.

65.1

- War Muuse! Halkan hadmaad timid?
- Halkan shalay baan imid.
- Oo shalay ma Sabti bay ahayd?
- Maya, shalay may ahayn Sabti. Waxay ahayd Jimce, berrina waa Axad.
- Anigu Isniintaan tagayaa Muqdisho.
- Oo markaa bishu waa immisa?
- Kolkaa bishu waa labaatameeyo.
- Muqdisho ma xaaskaagaa deggan?
- Maya. Laakiin hooyaday baa ku nool.
- Aabbahaana xagguu ku nool yahay?
- Immika wuxuu tagay Ceerigaabo, laakiin isna Muqdishuu deggan yahay. Adigu xaas miyaad leedahay?
- Haa.
- Wax carruur ahse?
- Shan carruuraan leeyahay.
- Oo immisa jir baad tahay?
- Waxaan ahay konton jir.
- Aabbahaana?
- Waa siddeetameeyo.

hadmaad < hadma baad

may < ma ay

Isniintaan < Isniinta baan

markaa < markaas

kolkaa < kolkaas

xaaskaagaa < xaaskaaga baa

xagguu < xaggee buu

isna < isaguna

Muqdishuu < Muqdisho buu

carruuraan < carruur ah baan

65.2

- Waryaa Ciise, ma miyi baa ku dhalatay?
- Haa, laakiin immika magaaladanaan deggan ahay.
- Oo maxaad ka qabataa?
- Waxaan ahay askari.
- Berii ma Burcaad tagaysaa?
- Berri bishu waa immisa?
- Waa siddeed iyo toban.
- Haa. Berriyaan tagayaa. Berrito ma Salaasaa?
- Haahey.
- Adigu ma halkanaad ku dhalatay?

magaaladanaan < magaaladan baan

Burcaad < Burco baad

berriyaan < berri baan

Salaasaa < Salaasa baa

halkanaad < halkan baad

- Maya. Baraawaan ku dhashay.
- Xaggay ka xigtaa Muqdisho?
- Koonfur.
- Ma xaggaasay Markana ka xigtaa?
- Haa.
- Shalay baan Bulaxaar ka imid oo
Ceerigaabo way ka fog tahay.
- Intay u jirtaa?
- Mooyi.

Baraawaan < Baraawe baan

xaggay < xagge bay

xaggaasay < xaggaas bay

intay < intee bay

mooyi < ma ogi

9. Hawlaha ka socda deriska

Qaybta 1aad

Shaqooyinka dadka deriska

hawl -sha *arbete* | work
socdaa, socotaa *pågår* | goes on

Dadku waxa ay u shaqeeyaan si ay lacag u helaan.

Ka dibna dadku waxa ay lacagtooda ku iibsadaan walxaha ay u baahdaan.

u baahdaa, baahataa = u baahan
yahay / tahay

U shaqeeya kooxo

Taxa dhammaan noocyada kala duwan ee shaqo ee ay dadku ka qabtaan deriskaaga.

taxaa *listar* | lists
tax -a *lista* | list
nooc -a, pl. -yo *typ, slag* | type, kind

Eega
Fiiriya taxa aad qorteen mar labaad.

Waa maxay shaqada ay badanaa raggu qabtaan?

rag -ga coll. *män* | men

Waa maxay shaqada ay badanaa haweenku qabtaan?

haween -ka coll. *kvinnor* | women

Ma jirtaa shaqo ay ka wada shaqeeyaan ragga iyo haweenku?

Cutubkan waxa aad ku arki doontaa shaqooyinka qaarkood oo lagaga shaqeeyo derisyada intooda badan.

qaarkood *en del av (dem)* | a part of (them)

intooda badan *en stor del av (dem), större delen av (dem)* | a large part of (them), the major part of (them)

Dadku waxa ay shaqooyinkan u qabtaan si ay lacag u helaan. Yaa qabta shaqooyinkan inta deriskaaga ku nool?

Dukaanlaha

Derisyada intooda badani waxa ay leeyihiin dukaan. Dadku waxa ay u baahan yihiin in ay iibsadaan walxaha aanay samayn karin ama beeran karin.



aanay < aan+ay de inte | they not
beertaa, inf. beeran odlar |
cultivates, grows

U shaqeeya kooxo

Soo booqda dukaan ku yaalla deriskiinna.
Waraysta dukaanlaha. Soo ogaada:

- badeecada uu ku iibiyo dukaanka.
- waxyaabaha ay dadka intooda badani iibsadaan.
- halka uu ka helo waxyaabaha uu dukaanka ku iibiyo.
- inta qof ee kale ee ka shaqaysa dukaanka

Uga warrama ardayda fasalkiinna waxa aad soo aragteen.

Immisa dukaan baa ku yaalla deriskiinna?

Waa maxay noocyada alaabta ay iibiyaan?

booqdaa, booqataa, imp. sg.
booqo, pl. booqda *besöker* |
visits

waraystaa, waraysataa, imp. sg.
warayso, pl. waraysta *frågar*
ut, intervjuar | *interviews,*
inquires

soo ogaadaa, ogaataa, imp. sg.
ogow, pl. ogaada *tar reda på* |
finds out

badeeco -da *varor* | *goods,*
merchandise

in -ta *mängd, antal* | *amount,*
number

Makhaayadda shaaha


Halkee baa ay dadka deriskaagu ka cabbaan shaaha?

Derisyada intooda badani waxa ay leeyihiin laba ama saddex makhaayadood oo ay dadku ka shaahaan. Mararka qaarkood wiilal iyo gabdho da' yar ayaa ka shaqeeya makhaayadda shaaha. Waxa ay iyagu ka qaataan lacag.

makhaayad -da bar
shaah -a te | tea
cabbaa dricker | drinks

shaahaa dricker te | drinks tea

qaataa, qaadataa tar, tar
emot | takes, receives



U shaqeeya kooxo

Soo booqda makhaayadda shaaha ee ku taal deriskaaga. Waraysta qofka iska leh. Soo ogaada:

- sida ay shaaha u samayso.
- xaddiga caleenta shaaha iyo sonkorta ee ay isticmaasho maalintiiba.
- qiimaha koobka shaaha.
- waxyaabaha kale ee ay iibiyaan.

iska leeyahay äger | owns

xaddi -ga kvantitet | quantity
caleen -ta blad | leafs
sonkor -ta socker | sugar
isticmaalaa, isticmaashaa
användar | uses
maalintiiba per dag | per day
qiimo (qiime) -ha pris | price
koob -ka kopp, glas, mugg | cup,
glass, mug

– inta ay le'eg tahay lacagta ay hesho maalintiiba. *le'eg lik | similar*

– inta qof ee kale ee ka shaqaysa makhaayadda shaaha.

Hudheelka cuntada


hudheel/hoteel -ka *hotell | hotel*
hudheelka cuntada *restaurang |*

restaurant

Ma ku yaallaan wax hudheello cunto ah deriskiinna?

Waa maxay noocyada cuntada ee ay iyagu iibiyaan?

Weli cunto ma ka cuntay hudheel?



Dadku waxa ay jecel yihiin hudheellada nadiifka ah, isla markaana adeegga wanaagsan.

adeeg -ga *tjänst, betjäning,*
service | service

Hudheelladu waxa ay buug ku qoraan noocyada kala duwan ee cuntada ay iibinayaan. Buugga waxa kale oo ku qoran qiimaha saxan kasta.

Rag iyo dumarba waa ay ka shaqeeyaan hudheellada cuntada. Qaarkood waxa ay dadka u soo dhigaan cuntada.

dumar -ka = haween -ka

u soo dhigaa serverar, ställer fram
(mat) till ngn | serves (food) to sb

Soo booqo hudheel cunto oo ku dhow gurigiinna.

Soo ogow waxa ku yaalla buugga iyo qiimaha saxan kasta.

Farmasiga

Farmasiga waxa lagu iibiyaa dawooyin.

farmasi -ga / farmashiye -ha
apotek | pharmacy
dawo -da läkemedel, medicin |
medicine

Dadka ka shaqeeya farmasiyadu ma aha dhakhtarro.

Marka hore dhakhtarka ayaa qora nooca dawada wax u taraysa bukaanka. Ka dib qofka buka ayaa dawada ka soo iibsada farmasiga.


taraa gör nytta, är effektiv | is useful,
is effective
bukaan -ka en sjuk, patient | patient

Dadku waxa ay jecel yihiin in ay dawada ka soo iibsadaan farmasiga ay joogaan dadka aqoonta u leh dawada.

Farmasi ma ku yaallaa tuuladiinna?

Halkee baa uu qoyskiinnu ka iibsadaa dawada?

Kaalinta shidaalka



Baabuurta yaryar, baabuurta waaweyn iyo basasku waxa ay u baahan yihiin shidaal ay ku socdaan. Darawaliintu waxa ay shidaalka ka iibsadaan kaalmaha shidaalka.

Kaalmaha shidaalku waxa kale oo ay iibiyaan saliidda la shito. Saliidda la shito waxa aynnu ku shubannaa faynuuska iyo shooladda.

kaalin -ka *vattentråg för kreatur*

| watering trough for cattle

shidaal -ka *bränsle* | fuel

kaalin -ta (-ka) shidaal -ka

bensinstation | petrol station

darawal -ka *chaufför* | driver

saliid -da *olja* | oil

shitaa, shidataa *tänder* | ignites,

lights up

shubtaa, shubataa *häller, pours*

shoolad -da *spis, kokplatta* | stove,

cooker

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010 & Muqdisho 2001: 30–34

Wadahadallo 66

66.0

- Shalay ma Khamiis bay ahayd?
- Maya. Shalay may ahayn Khamiis. Waxay ahayd Arbaca.

66.1

- Xaggeed tagaysaa?
- Ceerigaabaan tagayaa.
- Hadma?
- Maanta.
- Oo waa ayaanma?
- Waa Sabti.
- Ma halkaasaad deggan tahay?
- Haahey.

xaggeed < xaggee baad

Ceerigaabaan < Ceerigaabo baan

halkaasaad < halkaas baad

66.2

- Shalay maxay ahayd? Ma Khamiis mise Arbaca?
- Arbacay ahayd shalay oo waxaan ka imid Berbera.
- Anigu bishan laba iyo labaankeeda ayaan tagayaa Muqdisho.
- Oo bisha laba iyo labaankeedu ma Jimcaa?
- Maya, waa Axad.
- Wallaahi. Aniguna markaa waxaan tagayaa Shiinaha.
- Oo Shiinaha ma xaaskaagaa deggan?
- Maya. Laakiin waan jeclahay.

Arbacay < Arbaca bay

Jimcaa < Jimce baa

xaaskaagaa < xaaskaaga baa

66.3


- Waryaa Nuur, shalay ma Khamiis bay ahayd?
- Maya. Shalay may ahayn Khamiis. Waxay ahayd Arbaca.
- Ma Khamiistaad tagaysaa Boorame?
- Haa. Bisha soddonkeedana waxaan tagayaa Marka.
- Marka miyaad jeceshahay?
- Maya. Laakiin aabbahay baa deggan.

Khamiistaad < Khamiista baad

10.1 Diin iyo shimbiro

Waxaa la yiri, berigii hore diinku qolof adag ma lahayn. Waxa uu lahaa hilib aad u jilicsan.

qolof -ta skal
adag (adj) hård ▪ hard
jilicsan mjuk ▪ soft



Maalin maalmaha ka mid ah ayaa shimbiro u shireen, waxa ayna ku heshiiyeen in ay hilibkiisa cunaan.

shiraa håller ett möte ▪ convenes
ayna < ay+na och de ▪ and they
heshiiyaa kommer överens ▪ agrees

Uunrays ayaa diinkii u soo digay, waxa uuna ku yiri, "Ma og tahay in ay maanta shimbiro kuu shireen?"

uunrays -ka ekorre ▪ ground
squirrel
u digaa varnar ngn ▪ warns sb



Diinkii waxa uu yiri, "Maxaa ay lahaayeen?" Uunrayskii waxa uu yiri, "Waxa ay isku raaceen in ay ku cunaan."

lahaayeen de hade, de sa | they had,
they said
isku raacaa kommer överens ▪
agrees

Diinkii waxa uu yiri, "War uunrays, **sow Ilaahay ma joogin miyaa** halkii ay iigu tashanayeen?"

hal -ka plats ▪ place
tashadaa, tashataa diskuterar och
fattar beslut ▪ dicusses and
decides

"Haa. Alle waa joogay. Isaga ayaana wax waliba og."


Diinkii waxa uu yiri, "Sida uu Alle ii ilaalinayo Isaga ayaa og ee iska tag. Waad mahadsan tahay."

ilaaliyaa *skyddar, vakar över* ▪
watches, guards
iska tagaa *går sin väg* ▪ *goes away*

Subaxdii dambe shimbirihii waxa ay u yimaadeen in ay diinka hilibkiisa jilicsan cunaan.

Waxa ay ka soo duuleen geedihii.

duulaa *flyger* ▪ *flies*
düülaa *anfäller* ▪ *attacks*



Laakiin isla markiiba Ilaahay idankiis diinkii qolof adag ayaa lagu daboolay hilibkiisii jilicsanaa.

idan -ka *tillåtelse* ▪ *permission*
daboolaa *täcker* ▪ *covers*

Qolofa diinku aad ayay u adkayd. Shimbiruhu waa ay dhaawici waayeen. Halkii ayaa ay iyagu iska dhaawaceen.

dhaawacaa, dhaawacdaa, *inf.*
daawici *skadar* ▪ *hurts, injurs*
hal -ka *plats, ställe* ▪ *place, stead*
halkii *istället* ▪ *instead*

Sheekadee baad ugu jeceshahay - bakaylaha iyo diinka ama diinka iyo shimbiraha?

Maxaa aad u **jeclaatay**?

maxaa + u *varför* ▪ *why*
jeclaadaa, jeclaataa *blir förtjust i* ▪
becomes fond of, comes to like

'Waa' ku beddel 'ma aha' si aad u beddesho macnaha weerahan.

ku beddelaa *ersätter med ngt* ▪
substitutes with sth

1. Diinku waa xayawaan khatar ah.
2. Diinku waa xayawaan weyn.
3. Diinku waa xayawaan cuna hilib.
4. Diinku waa xayawaan dabaalan kara.
5. Diinku waa xayawaan cabba caanaha.

dabaashaa, dabaalataa *simmar* ▪
swims

Ka jawaab su'aalahan.

1. Maxaa aadan **jeclayn** in aad samayso?
2. Maxaa aadan **jeclayn** in aad cunto?
3. Maxaa aadan **jeclayn** in aad ciyaarto?

aadan < aad+aan *du+inte* ▪
you+not
jeclayn < *jecel+ahayn
ahayn reduced subj. *är, var* ▪ *is, was* (due to focus + negation)

Astaamayn

astaamayn -ta *använding av*
skiljetecken ▪ *use of punctuation marks*

Guuri weerahan. Ku dhig xarfaha waaweyn iyo joogsiyada meelaha ku habboon.

1. bakayluhu waa xayawaan yar waxa uu ku nool yahay duurka
2. haramcadku waa xayawaan weyn waxa uu seexdaa geedaha hoostooda
3. libaaxyadu ma seexdaan geedaha dhexdooda waxa ay seexdaan geedaha hoostooda
4. libaaxyadu waxa ay cunaan arigeenna iyagu waa xayawaan khatar ah

seexdaa, seexataa *lägger sig och sover* ▪ *goes to sleep*
hoostooda *under dem* ▪ *under them*

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 43–45

10.2 Naxwe

Sahro iyo Maryan waa magacyo gaar ah. Magacyada gaarka ah waxa ay ka bilowdaan xarfo waaweyn.

gaar ah *särskild, speciell* | special, private
magac gaar ah *egennamn* | proper noun

Magaca gaarka ah waa magac:

qof:	Sahro
maalin:	Talaado ^S / Salaasa ^N
bil:	Soon
magaalo ama tuulo:	Baydhabo
waddan:	Keenya
webi:	Jubba
buur:	Surad
bad:	Badweynta Hindiya

Soon -ka nionde månaden i muslimska året, *Ramadan* | the ninth month of the Muslim year, *Ramadan*

Surad *ett berg i närheten av* [Erigavo](#) | a mountain near *Erigavo*

U shaqeeya laba-labo.

1. Qor saddex magac ee gabdhood.
2. Qor saddex magac ee wiil.
3. Qor magacyada afar magaalo.
4. Qor magacyada laba webi.
5. Qor magacyada saddex maalmood ee toddobaadka.
6. Qor magacyada afar bilood.

toddobaad -ka *week* | *vecka*

Jawaabaha oo dhan waa magacyo gaar.

Guuri weerahan.

Hoos ka xarriiq magacyada gaarka ah ee ku jira weerahan.

1. Sahro iyo Maryan waa saaxiibbo isku fiican.
2. Waxa ay ku nool yihiin Marka.
3. Marka waxa ay ku taallaa xeebta Badweynta Hindiya.
4. Marka waxa ay u dhowdahay webiga Shabeelle.
5. Sahro waxa ay soo booqataa galab waliba ee Jimce ah ayeeyadeed.
6. Ayeeyadeed waxa ay ku nooshahay Golweyn.

Magac guud iyo magac gaar ah.

Waxa aan u qaybin karnaa magacyada laba kooxood.

Magac guud waa magac ka dhexeeya dad ama xoolo ama walxo.

Magaca guud kuma bilowdo xaraf weyn.

Guuri weeraha, hoosna ka xarriiq magacyada guud.

1. Waxa aan lumiyey qalin.
2. Waxa aan raadinayaa hilib.
3. Dugsigoodu waa yar yahay.
4. Aabbihiis waa beeraley.
5. Cunuggu waxa uu doonayaa caano.

Magaca gaarka ah waxa uu gaar u yahay dadka, magaalooyinka, waddamada, maalmaha, bilaha, webiyada iyo buuraha.

Magaca gaarka ahi waxa uu had iyo jeer ka bilowdaa xaraf weyn.

guud *vanlig, allmän* | general, normal

magac guud *egentliga*
substantiv | common noun

lumiyaa, *lumisaa förlorar, tappar*
bort | loses

cunug -ga *barn, bebis* | child, infant,
baby

Guuri weerahan oo hoos ka xarriiq magacyada gaarka ah.

1. Xaawo waa walaashaa.
2. Caasimadda Soomaaliya waa Muqdisho.
3. Ma waxa aad ku dhalatay Kismaayo?
4. Waxa aan Jimcaha aadaa masaajidka.
5. Buurta waddankeenna ugu dheer waa buurta Surad.

caasimad -da *huvudstad*,
metropol | *capital*

Ku guuri jadwalkan buuggaaga layliga. Ku qor jadwalka magacyada weerahan ku jira.

magacyo guud	magacyo gaar ah

1. Carruurtu waxa ay cunayaan quraac.
2. Canab waa macallimad.
3. Gabdhuhu waa faraxsan yihiin.
4. Axmed iyo Sahro waa walaalo.
5. Gurigeygu waxa uu ku yaal Garoowe.
6. Waxa aan doonayaa cunto.
7. Waxa aan dhashay Nofeembar.
8. Dhismihii waa la dumiyey.
9. Jubba waa webi weyn.
10. Baskii waa yimid.
11. Ina keen, aan badda ku dabaalannee.
12. Walaalkay waxa uu ku nool yahay Iglan.

dumiyaa, *dumisaa förstör*, *river*
ner | *destroys*, *demolishes*

dabaashaa, *dabaalataa*
simmar | *swims*

Wadahadallo 67–68

67.0

- Waa immisadii saacaddu?
- Waa lixdii iyo afar daqiiqo.

67.1

- Waa immisadii saacaddu?
- Waa lixdii. Xaggeed tagaysaa?
- Waxaan tagayaa Bulaxaar.
- Waa xaggee?
- Hargeysay waqooyi ka xigtaa.
- Booramana?
- Waqooyi-bari bay ka xigtaa.
- Immisadaad tagaysaa?
- Immikaan tagayaa.
- Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

xaggeed = xaggee baad

Hargeysay = Hargeysa bay

immisadaad = immisada baad

immikaan = Imminka baan

67.2

- Saacaddu waa immisadii?
- Tobankii weeye.
- Oo maanta ma Isniin baa?
- Maya. Waa Axad.
- Bishuna waa tuma? Ma Sebteembar baa?
- Haahey.
- Shaley baan ka imid Ceerigaabo, maantana waxaan tagayaa Bulaxaar.
- Anigu halkanaan deggan ahay immika.
- Oo ma reer Muqdishaad tahay?
- Maya. Waxaan ahay reer Baraawe.
- Xaas miyaad leedahay?
- Haa, waan leeyahay.
- Carruurse?
- Inán baan leeyahay.
- Waa immisa jir?

halkanaan = halkan baan

Muqdishaad = Muqdisho baad

- Saddex jir weeye.
- Ma waxay ku dhalatay halkan?
- Maya, Hargeysay ku dhalatay.

Hargeysay = Hargeysa bay

68.0

- Immika waa immisadii saacaddu?
- Waa lixdii oo rubuc la’.

68.1

- Waryaa Xasan! Ma in aad miyi ku noolaataad jeceshahay mise in aad Muqdisho ku noolaato?
- Waxa aan jeclahay in aan Muqdisho ku noolaado.
- Immika ma Muqdishaad ku nooshahay?
- Haa, laakiin Booramaan tagayaa kowda.
- Immika waa immisadii?
- Waa laba iyo tobankii oo shan daqiiqo la’.
- Boorame Hargeysa ma waxa ay ka xigtaa xagga ay Ceerigaabo Baraawe ka xigto?
- Maya. Boorame Hargeysa waxay ka xigtaa galbeed, laakiin Ceerigaabo Baraawe waqooyi baay ka xigtaa.
- Immika ma kowdii oo toban daqiiqo la’ baa?
- Haa.
- Immikaan tagayaa.
- Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

noolaataad = noolaato baad

Muqdishaad = Muqdisho baad

Booramaan = Boorame baan

immikaan = imminka baan

68.2

- Iska warran, Cabdillaahi.
- Waa nabadee. Maxaa aad sheegtay, Cigaal?
- Nabad. Saacaddu waa immisadii immika?
- Waa shantii oo la’ shan.
- Miyi baan tagayaa maanta.

- Ma reer miyi baad tahay immika?
- Maya. Aabbahay baa deggan halkaas.
- Immisadaad tegaysaa? immisadaad = immisada baad
- Waxaan tegayaa lixda.
- Halkaas tagayso xaggay ka xigtaa Burco? xaggay = xaggee bay
- Waxay ka xigtaa waqooyi-bari.
- Oo intay u jirtaa?
- Waxay u jirtaa intay Hargeysa u jirto intay = inta ay
Burco.
- Ma boqol iyo siddeetan kiiloomitir?
- Haa. Waa wax fog.

11. Saddex dibi iyo libaax

Inta aadan akhrin ka hor.

Ma u malaynaysaa in libaaxu yahay xayawaan khatar ah?

Fiiri cinwaanka sheekada. Maxaa aad u malaynaysaa in ay ku dhici doonaan dibiyada markii ay la kulmaan libaaxa ka dib?

dhici doonaan *will happen*
(*maxaa* often takes plural verb agreement)

Hadda akhri sheekada oo fiiri in aad saxan tahay iyo in kale.

saxan *correct(ed)*

U shaqeeya kooxo shan-shan ah. Mid waa libaax, mid waa dibi-cadde, mid waa dibi-guduudow, midna waa dibi-madoobe, midna waa weriye.

-e common compounding suff.


dibi-cadde *the white bull*

guduud -ka *röd färg*

dibi-guduudow *the red bull*

madow (madoobaa) *svart*

dibi-madoobe *the black bull*



Weriye: Saddex dibi ayaa waxa ay ku noolaan jireen meel kayn ah oo aan cid kale joogin. Saddexda dibi mid waa uu caddaa, midna waa uu madoobaa, kan kalena waa uu guduudnaa.

noolaan jireen -aan *infinitiv*

cid -da *folk, någon*

cid kale *någon annan*

caddaa < *cad+ahaa *var vit*

madoobaa < *madow+ahaa *was black*

guduudan *adj. red*

daaq -a *bete*

daaqa *betar*

ku biiraa *blir medlem i ngt, går*


med i ngt, ansluter sig till ngt

aar -ka *lejonhane*

aar ah *modig, orädd*


Waxa ay kayntooda cawska leh daaqaanba, maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa ku soo biiray libaax aar ah oo saaxiib la noqday

saddexdii dibi. Waxa ay ku heshiiyeen in ay cidlada iska weheshadaan.



ku heshiiyaa är sams, kommer överens om något
cidlo -da ödsligt område
wehel -ka 1. följeslagare, kompis
2. sällskap
weheshadaa tar ngn till sällskap

Maalmo ka dib ayaa dibigii caddaa oo daaq ku maqan, libaaxii la hadlay labadii dibi ee kale.



maqan absent, away | frånvarande, borta

Libaax: Maanta waxa aan doonayaa in aan idiin sheego arrin inoo gaar ah.

arrin -ta händelse, sak, angelägenhet
gaar ah särskild, speciell

Dibi guduud: Waan ka wada hadli karnaa wixii danteenna ah ee soo wad.

dan -ta mål, syfte, avsikt

Dibi madoobe: Waa sidaas ee wad.

Libaax: Meesha aynu joognaa waa kayd cidla' ah. In aan feejignaanno ayaa loo baahan yahay. Dibiga cadna midabkiisa ayaa la inagu soo raacayaa. Markaa aan iska erinno.


cidla' -da ödemark, wilderness
feejignaadaa is careful, cautious | är försiktig, uppmärksam
eryaa, eridaa chases away | jagar bort

Dibi guduud: Runtii waa arrin gar (gaar?) ah, waana sida aad sheegtay. Waa in aan ka feejignaannaa. Markaa waa in aan erinnaa.

Dibi madoobe: Mar haddii aad isku raacdeen waa in aan erinno. Wax dood ahi kama jirto.


isku raacaa *agrees | kommer överens*
dood -da *diskussion, debatt*

Weriye: Dibigii caddaa ayaa la eryey. Maalmo ka dibna libaaxii ayaa cidla ka helay oo cunay.



Weriye: Muddo ka dib ayaa uu Libaaxii la faqay dibigii guduudnaa.

muddo -da *period, tidsintervall*
faqaa *talar i hemlighet, talar mellan fyra ögon*




Libaax: Waxa uu ku yiri, "War dibigan madoobi maalintii ayaa uu dhalaalayaa ee aan iska erinno."

Dibi guduud: "Waa runtaa. Weliba aad ayaa uu u dhalaalayaa ee aan dhakhso isaga erinno."

runtaa *your truth*
weliba *still, also*
dhalaalaa *skiner, blänker*
dhakhso *quickness | snabbhet*
aan erinno *let's chase away*

Weriye: Sidii dibigii caddaa loo eryey ayaa dibigii madoobaana loo eryey. Libaaxii ayaa isna cidla' ka helay oo cunay.



Weriye: Maxaa soo haray? Waxa soo haray dibigii guduudnaa. Maxaa ku dhacay? Markii uu keligii soo haray ayaa la cunay.

soo haraa blir koar, återstår

Dibigii guduudnaa ee quruxda badnaa kolkii naftu ka sii baxaysey oo hilibkiisii libaaxu raamsanayo, waxa uu yiri, "Maanta ma aan dhimane waxa aan dhintay maalintii la cunay ee uu dhintay dibigii caddaa."

*raamsadaa/raabsadaa,
raamsataa tuggar, idisslar
dhintaa, inf. dhiman dies|dör
dhimane < dhiman ee*

Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan

*wadajir tillsammans, gemensamt
gooyaa skördar*

Uga jawaab su'aalahan buuggaaga layliga.

1. Maxaa ay kala ahaayeen saddexda xayawaan ee ku wada noolaa kaynta?

2. Midabbadee ayaa ay kala lahaayeen dibiyada?

3. Yaa ugu yimid kaynta?

4. Maxaa ay ku heshiiyeen?

5. Ma u malaynaysaa in uu libaaxu lahaa qorshe markii hore ee uu dibiyada u imaanayey?

*qorshe -ha plan, program,
strategi*

6. Qorshihii libaaxu ma u hirgalay?

hirgalaa förverkliga, genomföra

7. Maxaa ay tahay sheekadan dulucdeeda?

duluc -da syfte, avsikt, poäng

8. Dibigii guduudnaa maxaa ugu dambayntii ku dhacay?

Jila sheekada

jilaa spelar teater, uppför, dramatiserar

U shaqeyta kooxo shan-shan ah. Mid waa weriye, midna waa libaax, saddexda kalena waa dibiyo. Jila sheekada.

Xiriiriye - iyo

xiriiriye -ha konjunktion

Dibi guduud waxa uu ku noolaa kaynta.

Dibi madoobe waxa uu ku noolaa kaynta.

Labadan weerood ee gaagaaban waxa aan ka dhigi karnaa weero dheer.

Dibi guduud iyo dibi madoobe waxa ay ku noolaayeen kaynta.

Iyo waa xiriiriye. Waxa aan u isticmaali karnaa in aan iskula xirno laba weerood.

Isku xir weerahan. Isticmaal iyo.

isku xiraa knyter samman, binder ihop

1. Libaaxii waxa uu doonayey in uu cuno dibiga cad.

Libaaxii waxa uu doonayey in uu cuno dibiga madow.

2. Libaaxii waxa uu la hadlay dibigii guduudnaa.

Libaaxii waxa uu la hadlay dibigii madoobaa.

3. Libaaxii waxa uu dilay dibigii caddaa.

Libaaxii waxa uu dilay dibigii madoobaa.

4. Walaalkay waxa uu dugsiga u qaataa shaati buluug ah.

Walaalkay waxa uu dugsiga u qaataa surwaal madow.

5. Waxa aan jeclahay in aan ciyaaro kubbadda cagta.

Waxa aan jeclahay in aan ciyaaro kubbadda kolayga.

kubbadda kolayga *basket*

Hal-xiraalayaal

hal-xiraale -ha *gâta, rebus, korsord*

Ku hor qor calaamadda saxa (✓) jawaabta saxa ah ee hal-xiraalaha. Ku qor buuggaaga layliga.

1. Waxa aan cunaa hilibka. Waxa la iigu yeeraa boqorka xayawaanka.

la iigu yeeraa *man kallar mig*

• Waxa aan ahay waraabe.

• Waxa aan ahay maroodi.

• Waxa aan ahay libaax.

2. Waxa aan ifaa habeenkii. Dadku waa uu soomaa marka ay i arkaan. Waxana ay afuraan marka aan dhaco.

afuraa *bryter fastan efter solnedgången under Ramadan*

• Waxa aan ahayn bisha Safar.

- Waxa aan ahay bisha Muxarram.

- Waxa aan ahay bisha Ramadaan.

3. Waxa aan leeyahay afar lugood. Waxa aan ag joogaa dadka. Waxa aan jeclahay hilibka.

- Waxa aan ahay bisad.

- Waxa aan ahay daanyeer.

- Waxa aan ahay gabar.

4. Waxa aan leeyahay xoog. Waxa aan qaadaa dadka. Dadka intooda badan waxa ay iga dhiibaan lacag ijaar ah.

*dhiibaa överlämnar, betalar
ijaar -ka hyra*

- Waxa aan ahay baabuur.

- Waxa aan ahay geed.

- Waxa aan ahay buug.

5. Afka ayaan kuugu jiraa. Wax baad igu qaniintaa. Midabkeygu waa caddaan.

qaniintaa biter

- Waxa aan ahay carrab.

- Waxa aan ahay ilig.

- Waxa aan ahay mindi.

Sheekadee baad ugu jeceshahay cutubkan?

Maxaa aad u jeceshahay?

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 112–119

Wadahadallo 69

69.0

- Hadmaad timid?
- Waxa aan imid siddeeddii galabnimo.

hadmaad = hadma baad

69.1

- Yuusuf, ninkaasi waa kuma?
- Waa walaalkay.
- Magaciis?
- Saleebaan.
- Adigu hadmaad timid halkan?
- Waxaan imid shaley siddeeddii galabnimo.
- Oo xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Berbera.
- Xaggay ka xigtaa Berbera Hargeysa?
- Waxay ka xigtaa koonfur.
- Ma halkaasaad ku dhalatay?
- Maya, halkanaan ku dhashay.

xaggeed = xaggee baad

xaggay = xaggee bay

halkaasaad = halkaas baad

halkanaan = halkan baan

69.2

- Maanta waa ayaanma? Ma Sabti baa mise waa Axad?
- Waa Axad maanta.
- Ma meel baad tagaysaa?
- Haa. Berriyaan tagayaa Burco, shaleyna waxaan ka imid Boorame.
- Immisadii baa aad ka timid?
- Sagaalkii iyo badhkii galabnimaan ka imid.
- Oo ma halkaasaad deggantahay?
- Maya, laakiin Boorame waan jeclahay.
- Xaggeed deggan tahay?
- Waxaan deggan ahay Ceerigaabo.
- Miyaad leedahay xaas?

berriyaan = berri baan

galabnimaan = galabnimo baan

halkaasaad = halkaas baa aad

xaggeed = xaggee baa aad

- Haa.
- Carruurna?
- Waxaan leeyahay afar hablood iyo lix inan.

12. Hawlaha ka socda deriska

Qaybta 2aad

Caanaleyda

Waxa aynu caanaha ka maalnaa geela, lo' da, riyaha iyo idaha.



caanaley -da *mjölförsäljare* | milk sellers

caano -ha pl. noun *mjölk* | milk

maalaa *mjölkar* | milks

ido -ha pl. noun *sheep*

Caanaha waxa inta badan laga keena miyiga. Caanaha waxa keena baabuur iyaga oo ku jira haamo culan. Ka dibna waxa suuqa ku iibiya haween. Haweenkaas waxa la ^{yidhaahdaa} yiraahdaa caanaley.

miyi -ga *landsbygd* | countryside

haan -ta pl. haamo *vatten- eller*

mjölklaska | water or milk vessel

culan *rengjord med rök och värme* | cleaned with smoke and heat

haween -ka coll. *kvinnor* | women = **dumar -ka**

Caanaleyda qaarkeed waxa ay u qaadaan caanaha guryaha, kana soo iibiyaan. Qaar kalena waxa ay leeyihiin dukaanno la ^{yidhaahdo} yiraahdo caanaley.

1. Halkee baa uu qoyksiinnu ka helaa caanaha?

2. Weligaa caano ma ka soo iibisay caanaley?

3. Soo ogow nooca caanaha ee lagu iibiyo deriskiinna.

4. Soo ogow nooc kasta qiimahiisa.


nooc -a *sort, typ* | kind, type

qiimo/qiime -ha *pris* | price

bacadle -ha *gatuförsäljare* | street vendor

Bacadlayaasha

Bacadlayaashu kuma iibiyaan alaabtooda dukaan.



Bacadlayaashu meel bannaan oo suuqa ah ayaa ay wax ku iibiyaan ama waxa ay la wareegaan suuqyada.

wareegaa *går runt* | circulates,
walks around

Bacadlayaasha qaar baa allifa heeso ay ku sheegayaan waxtarka badeecadda ay wataan. Bacadlayaasha qaarkood ayaa ku dhawaaqa heeso ku saabsan in ay muhiim tahay alaabtoodu.

allifaa *författar* | composes
badeecad -da *varor* | goods
wataa, wadataa *bär med sig* |
carries along

Dadku waxa ay jecel yihiin in ay wax ka iibsadaan bacadlayaasha. Bacadlayaashu waxa ay iibiyaan alaab aad uga sicer jaban kuwa dukaanleyda.

aad + u *mycket* | very, much
ka än | than
sicir -ka = qiime -ha *pris* | price
jaban *billig* | cheap

1. Soo booqda suuqa idiinku dhow.

idiin < idin+u
idiinku < idin+ugu
ugu dhow *närmast* | closest

2. Soo ogaada badeecadda ay iibiyaan bacadlayaashu.

3. Taxa noocyada badeecadda.

4. Soo ogow waxyaabaha ay iibiyaan bacadlayaasha deriskiinnu.

Farsamoyaqaanka


Qalabka farshaxanku waa waxyaabo lagu sameeyay gacanta. Dadka qaarkood waxa ay lacag ka helaan samaynta qalabka farshaxanka.

farsamo-yaqaan -ka *hantverkare, händig person | craftsman, handy man*
farshaxan -ka *konst, hantverk | arts and crafts*
qalab -ka *coll. föremål, utrustning, verktyg | items, equipment, tools*



Farshaxanka waxa ay dadkaasi ka sameeyaan waxyaabo kala duwan.

Eeg
Fiiri qalabka farshaxanka ee hoos ku sawiran.



1. Waa maxay alaabta iyaga laga sameeyay?
2. Ma ku haysataa wax iyaga ka mid ah gurigiinna?
3. Ku tax buuggaaga layliga walxaha lagu sameeyo deriskaaga.
4. Maxaa aynu uga jeednaa farsamo-yaqaan?
5. Waa maxay macnaha qalab farsamo?

alaab -ta *material*

jeedaa *vänder sig, riktat sig | turns, faces*
uga jeedaa *menar, avser med ngt | means, intends by sth*

Nijaarka

Nijaarka laftiisu waa farsamo-yaqaan.



Nijaarku waxa uu ku dhex shaqeeyaa nijaarad. Waxa uu adeegsadaa qalab sida miishaarta iyo dubbaha si uu alaab ugu sameeyo guryaheenna iyo dugsiyadeenna. Alaabta waxa uu ka sameeyaa ^{loox}alwaax.

Nijaarku waxa uu sameeyaa albaabbo, kuraas, miisas iyo sabuurado. Ka dibna nijaarku waxa uu ka helaa lacag marka uu alaabtan ka iibiyo macmiisha.

1. Waa maxay alaabta dugsiyiinna taalla ee uu sameeyay nijaarku?

2. Halkee baa ay nijaariintu ka shaqeeyaan deriskiinna?

Dhuxullayaasha

Dadka qaar baa lacag ka hela iyaga oo dhuxusha sameeya.

Shaqaalaha dhuxusha shida waxa ay ka shaqeeyaan duurka. Marka hore waxa ay soo gurtaan dhirta qallashay.

nijaar -ka *snickare* | carpenter

laftiisa *han själtv* | he himself

nijaarad -da *snickarverkstad* | carpentry

miishaar -ta *såg* | saw

dubbe -ha *hammare* | hammer

alwaax -da = loox -a *trä* | wood

kuraas -ta Ar.pl. = pl. **kursiyo -da** of **kursi -ga** *stol* | chair

sabuurad -da *svart tavla* | blackboard

macmiil -sha coll. *kunder* | customers

dhuxulle -ha *koltillverkare, kolare* | charcoal burner, producer

shidaa *tänder, bränner* | ignites, burns

duur -ka *skog, vildmark* | woods, wilderness

qallalaa *torkar* | dries



Dabadeedna faas ayaa ay xaabada ku googooyaan.

Ka dib shaqaalaha dhuxushu waxa ay xaabada ku tuulaan goob bannaan. Waxa ayna ku daboolaan xaabada ^{jiingado} taniig iyo carro. Markaa ka dib ayaa ay dab ku shidaan. Dabku waxa uu u shidma aayar-aayar, ololna ma yeesho.



Shaqaaluhu waxa ay daayaan dabka oo aayar shidmaya ilaa laba toddobaad. Marka ay xaabadu noqoto dhuxul, dabka waa la deminayaa.

U shaqeeya kooxo. Ka dooda qaabka loo sameeyo dhuxusha.

Qor lix ^{weedhood} weerood oo aad ku muujinaysid sida aynu u samaysanno dhuxusha.


faas -ka yxa | axe
xaabo -da ved | firewood
googooyaa hugger i små bitar | chops into pieces
tuulaa lägger på hög | piles up
goob -ta plats | place
jiingad -da = laamiyeeri -ga coll. = taniig -ga coll. korrugerad plåt | corrugated metal sheet(s)
shidmaa fattar eld, brinner | gets lit, burns
aayar -ta sakta | slowly
olol -ka flamma | flame
yeeshaa har, får | has, acquires

daayaa låter vara | leaves alone
ilaa (upp) till, (up) to
noqdaa, noqotaa blir | becomes
demiya släcker | extinguishes

qaab -ka sätt, system | manner


muujiyaa visar | shows

Habkee baa dhuxusha loo keenaa magaalada?




Shaqaalaha dhuxushu waxa ay saaraan dhuxusha baabuur waaweyn, iyagoo keena ^{sayladda}suuqa dhuxusha.

saaraa *placera* | puts
saylad -da = *suuq* -a *marknad* |
market



Ka dib dhuxullayaashu waxa ay dhuxusha ku dhex iibiyaan ^{sayladda}suuqa dhuxusha.



Dadka qaarkood ayaa isticmaala dameero si ay jawaannada dhuxusha u geystaan guryahooda.

isticmaalaa = *adeegsadaa*
använder | uses
dameer -ka *äsna* | donkey
jawaan -ka *säck* | sack
geystaa, geysataa *transportera*,
leverera | transport, bring

1. Maxaa aynu dhuxusha u isticmaalnaa?
2. Qoyskiinnu dhuxusha ma ku karsadaa cuntada?
3. Xaggee baa uu qoyskiinnu ka helaa dhuxusha?

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010 & Muqdisho 2001: 35–40

Wadahadallo 70–71

la' utan | *without, lacking*

70.0

- Waxaa uu yimid afartii, wuxuuna tagay toddobadii. Intee baa uu joogay?
- Waxa uu joogay saddex saacadood.

71.0

- Immisa baa looga socdaa Hargeysa Burco?
- Waxaa looga socdaa saddex cisho.

71.1

- Ma waxa aad ka timid Muqdisho?
- Haa.
- Intee baa ay u jirtaa Boorame?
- Waa ay ka fog tahay.
- Intee baa looga socdaa?
- Waxaa looga socdaa lix iyo labaatan cisho iyo saddex habeen.
- Boorame iyo Burcona?
- Labadana waxaa loo kala socdaa shan maalmood iyo habeen.
- Adigu ma reer Muqdisho baa aad tahay?
- Maya. Immika Muqdisho baa aan ku nool ahay, laakiin reer Boorame baa aan ahay.
- Ma leedahay xaas?
- Haahey.

70.0

- Wuxuu yimid afartii, waxaanu tagay toddobadii. Intee buu joogay?
- Wuxuu joogay saddex saacadood.

71.0

- Immisaa looga socdaa Hargeysa Burco?
- Waxaa looga socdaa saddex cisho.

71.1

- Ma waxaad ka timid Muqdisho?
- Haa.
- Intay u jirtaa Boorame?
- Way ka fog tahay.
- Intee looga socdaa?
- Waxaa looga socdaa lix iyo labaatan cisho iyo saddex habeen.
- Boorame iyo Burcana?
- Labadana waxaa loo kala socdaa shan maalmood iyo habeen.
- Adigu ma reer Muqdishaad tahay?
- Maya. Immika Muqdishaan ku nool ahay, laakiin reer Booramaan ahay.
- Ma leedahay xaas?
- Haahey.

- Immisa carruur ah baa aad leedahay?
- Waxa aan leeyahay siddeed carruur ah.
- Ma inammo baa mise waa hablo?
- Waa saddex hablood iyo shan inan.

71.2


- War, waa immisadii?
- Waa sagaalkii oo shan iyo toban daqiiqo la’.
- Ma meel baa aad tagaysaa?
- Haa, galabta baa aan tagayaa Burco.
- Immisada?
- Toddobada galabnimo.
- Immisa baa looga socdaa Burco halkan.
- Way fog tahay Burco. Waxaa looga socdaa lix habeen iyo shan maalmood.
- Ma halkaas baa aad deggan tahay?
- Haa.
- Oo maanta bishu waa immisa?
- Waa labaatameeyo.
- Ma Arbaco baa maanta?
- Maya. Waa Salaasa.
- Anigu Khamiista baa aan tagayaa Ingiriiska.
- Ma Ingiriiska baa aad ku dhalatay?
- Maya. Waxa aan ku dhashay Ceerigaabo.

- Immisa carruuraad leedahay?
- Waxaan leeyahay siddeed carruura.
- Ma inammaa mise waa hablo?
- Waa saddex hablood iyo shan inan.

71.2

- War, waa immisadii?
- Waa sagaalkii oo shan iyo toban daqiiqo la’.
- Ma meel baad tagaysaa?
- Haa, galabtaan tagayaa Burco.
- Immisada?
- Toddobada galabnimo.
- Immisaa looga socdaa Burco halkan.
- Way fog tahay Burco. Waxaa looga socdaa lix habeen iyo shan maalmood.
- Ma halkaasaad deggan tahay?
- Haa.
- Oo maanta bishu waa immisa?
- Waa labaatameeyo.
- Ma Arbaca maanta?
- Maya. Waa Salaasa.
- Anigu Khamiistaan tagayaa Ingiriiska.
- Ma Ingiriiska baad ku dhalatay?
- Maya. Waxaan ku dhashay Ceerigaabo.

13. Baqashii iyo cusbadii



baqal -sha mule | mulāsna
cusbo -da = milix -da salt

Maalin waliba Faarax waxa uu u wadi jirey baqashiisa badda si uu ugu soo qaado cusbo. Faarax waxa uu dul saaray baqashii jawaanno cusbo ah. Intaa ka dib waxa ay ku soo noqdeen tuuladii.

wadaa leads, drives | leder, för

si + u in order to

ku on it (the mule)

ku soo noqdaa returns to

tuulo -da by



Hortooda waxa ahaa webi yar oo ay dhex mari jireen. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa baqashii ku dhex kuftay webigii yaraa. Markii ay kuftay jawaannadii waxa ay ku dhaceen biyihii.

hortooda in front of them

kufaa faller, ramlar

ku dhacaa falls into

Maxaa ku dhacay markii ay cusbadii qoyday?


ku dhacaa happens to sth
qoyaa becomes wet | blir blöt

Cusbada inteedii badnayd waxa ay raacday biyihii webiga. Jawaannadii waxa ay noqdeen fudayd.

inteedii badnayd *the major part of it, most of it*
raacaa *follows, goes along with*
fudayd -ka *sth light | ngt lätt*

Baqashu waxa ay ahayd mid caqli badan. Laga bilaabo waqtigaas maalin waliba baqashii waxa ay isku ridi jirtey biyaha webiga si cusbadu uga fududaato.

caqli -ga *sinne, intelligens, förstånd*
caqli badan *intelligent*
isku ridaa *throws oneself into | kastar sig i*
fududaadaa *becomes lighter | blir lättare*



Faarax kuma uusan farxin arrintaas. Laakiin waxa uu helay fikrad.

ku farxaa *gläder sig åt ngt*
fikrad -da *tanke, idé*

Maalintii ku xigtay waxa uu saaray baqashii jawaan ciid ah.

ciid -da *sand, jord*

Maxaa ku dhacaya ciidda marka ay qoydo?

Markii baqashii ay gashay biyihii ayaa ciiddii waxa ay noqotay mid culus.

culus *heavy | tung*

Baqashii masaakiinta ahayd waa halgantay si ay uga baxdo biyaha. Jawaankii biyuhu culayska ka dhigeen ayaa mar waliba hoos u celinayey baqashii.

masaakiin -ta *coll. stackare*
ka dhigaa *gör ngt av ngt, åstadkommer, skapar*
halganaa *kämpar*
culays -ka *vikt, tyngd*
hoos *ner, nere*
celiyaa *för tillbaka, drar tillbaka, tar tillbaka, lämnar tillbaka, stoppar, hindrar*
bixiyaa *får ut ngn, får upp ngn, får ngn att ge sig av*

Ugu dambayn Faarax ayaa bixiyey baqashii. Baqashii mar dambe iskuma ridin biyihii.

Qor jawaabta saxa ah.

1. Xaggee buu ku noolaa Faarax?

b) magaalo

t) tuulo

j) beer

2. Maxaa uu u aadey badda?

b) in uu ku dabaasho

dabaashaa, dabaalataa simmar

t) in uu qabsado kalluun

j) in uu ka helo cusbo

3. Maxaa ay baqashu qaadi jirtay maalin waliba?

b) jawaan cusbo ah

t) jawaan ciid ah

j) jawaan bur ah

4. Maxaa ku dhacay jawaankii cusbada ahaa markii uu qoyey?

b) Waxa uu noqday culays.

t) Waxa uu noqday jileec.

jileec -a mjukhet

j) Waxa uu noqday fudeyd.

5. Sidee buu u khatalay Faarax baqashii?

khatalaa lurar

b) Cusbo ayaa uu ku shubay jawaankii.

shubaa häller

t) Ciid ayuu ku shubay jawaankii.

j) Dhagxaan ayaa uu ku shubay jawaankii.

Erayo labo alan leh.

Fiiri erayadan. Waxa ay leeyihiin labo alan.

baqal = ba/qal

faras = fa/ras

Guuri erayadan.

U qaybi labo alan.

daba, xubin, bare, guri, nacnac, gabar, qalin, tuke, orgi, dhagax, lolol, xiddig, fure, jilib, kubbad, dhabar, dibi, ayax

Maahmaahyo

Macnee maahmaahdan? Macallinka la kaasho.

la kaashadaa tar hjälp av ngn

1. Aqal tiir la'aan ma dhismo.

tiir -ka stock, påle, pelare

2. Hadal waayeel waa guud mar.

waayeel -ka äldre person, gamla personer

3. Nimaan Ilaahay ahayni ushu way ka dhacdaa.

4. Xaal Allaa og xaajana ninkii galay.

*?? xaal -ka = xaalad -da
kompensation, skadestånd*

xaaj -ka välfärd till Mecka

5. Nin madax ah ma lur yara.

lur -ta problem, besvär, irritation

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001:123–126

Wadahadallo 72

72.0

- Boorame ma inta ay halkan ka fog tahay ayaa ay Burcona ka fog tahay?
- Maya. Burco baa ka sii fog. Burco waxaa halkan looga socdaa shan maalmood iyo laba habeen. Booramana waxaa looga socdaa afar habeen oo keliya.

72.1

- Waryaa Cismaan, ma waxa aad tagaysaa Hargeysa?
- Haa. Waxa aan tagayaa berri.
- Ma aroornimo mise galabnimo?
- Casarka baa aan tagayaa.
- Immisada?
- Afarta iyo rubuca.
- Oo Hargeysa ma inta ay halkan ka fog tahay ayaa ay Burcona ka fog tahay?
- Maya. Burco baa ka sii fog. Burco waxaa halkan looga socdaa shan maalmood iyo laba habeen, Booramana waxaa looga socdaa afar habeen oo keliya.
- Aabbahaa ma Hargeysa baa uu deggan yahay?
- Maya. Waxa uu deggan yahay Laas Caanood.

72.0

- Boorame ma intay halkan ka fog tahay ayay Burcana ka fog tahay?
- Maya. Burcaa ka sii fog. Burco waxaa halkan looga socdaa shan maalmood iyo laba habeyn. Booramana waxaa looga socdaa afar habeyn oo keliya.

72.1

- Waryaa Cismaan, ma waxaad tagaysaa Hargeysa?
- Haa. Waxaan tagayaa berri.
- Ma aroornimo mise galabnimo?
- Casarkaan tagayaa.
- Immisada?
- Afarta iyo rubuca.
- Oo Hargeysa ma intay halkan ka fog tahay ayay Burcana ka fog tahay?
- Maya. Burcaa ka sii fog. Burco waxaa halkan looga socdaa shan maalmood iyo laba habeen, Booramana waxaa looga socdaa afar habeen oo keliya.
- Aabbahaa ma Hargeysuu deggan yahay?
- Maya. Wuxuu deggan yahay Laas Caanood.

- Oo Laas Caanood waa xaggee? Ma bari baa ay halkan ka xigtaa mise waqooyi?
- Waxa ay ka xigtaa waqooyi-bari.
- Iyadana intee halkan looga socdaa?
- Waxaa looga socdaa laba habeen oo keliya. Immika baa aan tagayaa. Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

72.2

- Ninkaasi ma Maraykan baa?
- Maya, waa Ruush.
- Ma halkan baa uu deggan yahay immika?
- Haahey. Muqdisho waxa uu yimid kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo sagaashankii.
- Maxaa uu qabtaa? Ma macallin baa?
- Ma ogi.
- Hargeysa ma waxa ay halkan ka fog tahay inta ay Berbera ka fog tahay?
- Maya, Berbera baa ka sii fog. Berbera waxa halkan looga socdaa toban maalmood iyo lix habeen, Hargeysana lix maalmood oo keliya.
- Adigu xaggee baa aad ku dhalatay, ma Muqdisho mise Hargeysa?
- Waxa aan ku dhashay Muqdisho.
- Xaas miyaad leedahay?
- Haa.

- Oo Laas Caanood waa xaggee? Ma bari bay halkan ka xigtaa mise waqooyi?
- Waxay ka xigtaa waqooyi-bari.
- Iyana intee halkan looga socdaa?
- Waxaa looga socdaa laba habeen oo keliya. Immikaan tagayaa. Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

72.2

- Ninkaasi ma Maraykan baa?
- Maya, waa Ruush.
- Ma halkanuu deggan yahay immika?
- Haahey. Muqdisho wuxuu yimid kun iyo sagaal boqol iyo laba iyo sagaashankii.
- Muxuu qabtaa? Ma macallin baa?
- Mooyi.
- Hargeysa ma waxay halkan ka fog tahay intay Berbera ka fog tahay?
- Maya, Berberaa ka sii fog. Berbera waxa halkan looga socdaa toban maalmood iyo lix habeyn, Hargeysana lix maalmood oo keliya.
- Adigu xaggeed ku dhalatay, ma Muqdisho mise Hargeysa?
- Waxaan ku dhashay Muqdisho.
- Xaas miyaad leedahay?
- Haa.

- Carruurna?
- Ma lihi.

- Carruurna?
- Ma lihi.

14.M Goorma ayaa aan dhimanayaa?

Inta aadan akhrin ka hor:

Ma taqaan sheekooyin ku saabsan Juxa?

Nin nooc ee ah ayaa uu ahaa?

Ilaahay ayaa og waqtiga aan dhimanayno.



Beri baa Juxa waxa uu doonay in uu qoryo soo gurto. Waxa uu fuulay geed weyn si uu laamaha qallalay uga soo gurto. Markii uu dhowr laamood soo gooyey ee uu dhulka soo dhigay ayaa uu bilaabay in uu faaskiisii afka badnaa ku garaaco oo uu ku gooyo laantii uu xagga hore kaga taagnaa.

Isla markiiba waxa soo garab istaagey nin aad u yaabban oo cabsi iyo welwel wejigiisa ka muuqato. Waxa uu Juxa ku yiri, "War iska jir khatarta aad ku sugan tahay. Laanta aad saaran tahay ayaa salka ka soo go'aysa. Marka aad goysid adiga iyo laanta dhulka ayaad ku soo wada dhici doontaan." Juxa iyo

goorma? *when?* ▪ *när?*
dhintaa, dhimataa *dör* ▪ *dies*

qori -ga, pl. qoryo -ha *träbit* ▪
piece of wood
gurtaa, gurataa *plockar, samlar* ▪
picks, collects
qallalaa, qallashaa *torkar* ▪ *dries*

laan -ta, pl. laamo *gren* ▪ *branch*
gooyaa *kapar av* ▪ *cuts off*
faas -ka *yxa* ▪ *axe*
af -ka *egg* ▪ *cutting edge*
af badan *vass* ▪ *sharp*
ku garaacaa *slår med* ▪ *hits with*
xagga hore *framedel, här: längre ut*
▪ *front part, here: outer part*
kaga < ku (laantii) + ka (xagga)
taagan *stående, placerad upprät* ▪
standing, in upright position
isla *samma* ▪ *same*
garab -ka *axel, sida* ▪ *shoulder, side*
yaabban *förvånad* ▪ *surprised*
cabsi -ga *rädsla* ▪ *fear*
welwel -ka *oro* ▪ *worry*
iska jir *akta dig* ▪ *watch out*
ku sugan yahay *befinner sig i* ▪
finds oneself in
sal -ka *bas* ▪ *base*
ka go'aa *går av vid* ▪ *breaks at*
dhacaa, inf. dhici *faller* ▪ *falls*

laantii oo is wata ayaa islamarkaasna dhulka ku soo dhacay. Juxa intuu markiiba boorkii iska jafay ayaa uu ka daba orday ninkii, waxa uuna ku yiri, "Ninyahow waxa aad tahay nin og waxa soo socda ee ii sheeg goorta aan dhimanayo."

Ninkii waxa uu la yaabay doqonnimada Juxa, waxa uuna ku yiri isaga oo ku ciyaaraya, "Waxa aad dhimanaysaa marka dameerkaagu seynta kor u taago oo uu qayliyo, dhuusana ku daro."



Maalintii dambe Juxa dameerkiisii waxa uu arkay dameer kale. Markaas ayaa uu seynta kor u taagey, qaylo iyo dhuusana isku daray. Markii arrintu sidaa u dhacday, Juxa kafan ayuu soo qaatay oo uu isku duubay oo geed weyn oo magaalada ka baxsan hoos seexday.

islamarkaas *samtidig, just då* ▪ in that very same moment

intuu < inta uu *så snart han* ▪ as soon as he

markiiba *snabbt, genast* ▪ quickly, at once

iska jafaa *skakar av sig* ▪ shakes off (from oneself)

boor / boodh -ka *damm* ▪ dust

la yaabaa *förvånas över* ▪ is surprised by

doqonnimo *dumhet* ▪ stupidity

sayn -ta *svans* ▪ tail

kor + u *upp* ▪ up

dhuuso *ffärt, fis* ▪ fart

qayliyaa *skriar* ▪ cries, screams

ku daraa *lägger till* ▪ adds to sth


arrin -ta *angelägenhet* ▪ matter

kafan -ta *liksvepning* ▪ white cloth used to wrap a body for burial

isku duubaa *sveper sig i ngt* ▪ wraps oneself in sth

ka baxsan *utanför, på visst avstånd från* ▪ outside, at a certain distance from

U shaqeeya koox-koox. Ka dooda su'aalahan. **ka doodaa** *diskuterar ngt* ▪ *discusses sth*



1. Maxaa uu Juxa u fuulay geedka?

2. Sidee buu ninku ku ogaadey in uu Juxa soo dhacayo?

3. Maxaa uu ugu maleeyey Juxa in uu og yahay ninku waxa soo socda?

u maleeyaa *tror* ▪ *thinks, believes*
ugu < u (maxaa) + u (maleeyaa)
soo socdaa *kommer att hända* ▪ *will happen*

4. Maxaa uu Juxa isu duuduubay oo dhulka isugu tuuray?

is duuduubaa *soeper in sig (flera varv)* ▪ *drapes oneself (in several layers)*

5. Ma taqaan sheeko ku saabsan Juxa? U sheeg sheekada saaxiibbadaa.

is tuuraa *kasta sig* ▪ *throw oneself*
isugu < is + u (maxaa) + ku (dhulka)

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 75–77

14.H Goorma ayaa aan dhimanayaa?

Inta aanad akhriyin ka hor:

aanad^N = aadan^S
akhriyin (gr. 1) = akhrin (gr. 2)

Ma taqaan sheekooyin ku saabsan Juxe?

Nin nooc ee ah ayaa uu ahaa?

Ilaahey ayaa og waqtiga aan dhimanayno.



Beri hore waxa jirey nin Juxe la odhan jirey. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu doonay in uu qoryo soo gurto. Waxa uu fuulay geed weyn si uu laamaha qallalay uga soo gurto. Markii uu dhowr laamood soo gooyey ee uu dhulka soo dhigay ayaa uu bilaabay in uu faashkiisii afka badnaa ku garaaco oo uu ku gooyo laantii uu xagga hore kaga fuushanaa.

faash -ka *yxa* • *axe*

Isla markiiba waxa u yimi nin aad u yaabban oo cabsi iyo werwer wejigiisa ka muuqdo. Waxa uu Juxe ku yidhi, "Waar, iska jir halista aad ku sugan tahay. Laanta aad saaran tahay ayaa gunta ka soo go'aysa. Marka aad goysid adiga iyo laantuba dhulka

yimi = yimid
werwer = welwel = walwal

halis -ta = khatar -ta

gun -ta = sal -ka

ayaaad ku soo wada dhici doontaan." Juxe iyo laantii oo is wata ayaa islamarkiiba dhulka ku soo dhacay. Juxe intuu markiiba boodhkii iska tiimay ayaa uu ka daba orday ninkii, waxaanu ku yidhi, "Ninyahow waxa aad tahay nin og waxa soo socda ee ii sheeg goorta aan dhimanayo."

iska tiimaa = iska jafaa *skakar av sig* | shakes off (from oneself)
waxaanu = wuxuuna = waxa uuna


Ninkii waxa uu la yaabay doqonnimada Juxe, waxaanu ku yidhi isaga oo ku ciyaaraya, "Waxa aad dhimanaysaa marka dameerkaagu uu dabada kor u taago oo uu qayliyo, dhuusana ku daro."

dabo -da = sayn -ta



Maalintii dambe ayaa uu Juxe dameerkiisii arkay dameer kale. Markaas ayaa uu dabada kor u taagey, qaylo iyo dhuusana isku daray. Markii arrintu sidaas u dhacday, Juxe kafan ayuu soo qaatay oo uu isku duubay oo geed weyn oo magaalada ka baxsan ayaa uu hoos seexday, waxaanu yidhi, "Waa aniga dhintay."

U shaqeeya koox-koox.
Ka dooda weydiimahan.



- 1 . Maxaa uu Juxe u fuulay geedka?
2. Sidee buu ninku ku ogaadey in uu Juxe soo dhacayo?
3. Maxaa uu ugu maleeyey Juxe in uu og yahay ninku waxa soo socda?
4. Maxaa uu Juxe isu duuduubay geedka hoostiisa?
5. Ma taqaan sheeko ku saabsan Juxe? U sheeg sheekada saaxiibbadaa.

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Hargeysa 2001: 75–77

Wadahadallo 73

73.0

- Immisaa looga dhaxaa Hargeysa Burco?
- Waxaa looga dhaxaa saddex cisho.

immisaa < immisa baa
dhaxaa är på resande fot över natten |
is on a journey overnight

73.1

- Waa immisadii saacaddu?
- Waa kow iyo tobankii oo la' shan daqiiqo.
- Ma meel baad tagaysaa?
- Haa.
- Ma meel fog baa?
- Haa.
- Intee looga dhaxaa halkan? Ma inta Burco looga dhaxaa?
- Maya, way ka fog tahay. Waxaa looga dhaxaa siddeed cisho.
- Oo meeshaa magaceed?
- Boorame.
- Wallaahi! Laakiin Boorame Jigjigaa ka sii fog.
- Haahey. Iyada waxaa looga dhaxaa halkan siddeed cisho iyo laba habeen.

intee < intee baa looga dhaxaa

dhaxaa < dhaxo baa

meeshaa = meeshaas

Jigjigaa < Jigjiga baa.

73.2

- Maanta waa ayaanma? Ma Sabti baa mise waa Axad?
- Waa Isniin. Bishuna waa Oktoobar.
- Ma saddexdii Oktoobar baa?
- Maya. Waa toddoba maanta.
- Siddeeddeedaan tagayaa Ceerigaabo.
- Oo immisaa looga dhaxaa Hargeysa Ceerigaabo.

siddeeddeedaan < siddeeddeeda baa aan
immisaa < immisa baa

- Waxaa looga dhaxaa inta Maydh looga dhaxo.
- Oo waa immisa?
- Waa shan maalmood.

15. Hawlaha ka socda deriska

Qaybta 3aad

Halista jaridda geedaha

Jaridda geeduhu waxa ay dhulka u beddeshaa lamadegaan. Lamadegaanku ma laha biyo.



Xididdada geeduhu waxa ay isu qabtaan carrada san. Marka aynu geedo jarno, waxa carrada san qaada dabaysha iyo biyaha socda. Waxa aynu sidan u naqaan carroguur. Meeshii aan carro san lahayn waxba kama baxaan.

1. Maxaa dhici doona haddii aynu wada jarno dhammaan dhirta ku taalla degaanka aynu deggan nahay?
2. Maxaa aynu qaban karnaa si aynu u joojinno carroguurka?
3. Maxaa ku dhici doona xoolaheenna haddii biyo la waayo?


jaraa *hugger, skär* | cuts (down)
jarid -da *att hugga* | cutting (down)
u beddelaa *förändrar, förvandlar*
till | changes sth into
lama-degaan -ka *öken* | desert

xidid -ka *rot* | root
isu < **is+u** *till sig* | to oneself
isu qabtaa *håller fast,*
binder | eng.???
san = **wanaagsan** *god, bra* | good
carro -da san *bra jord, bördig jord* |
good soil, fertile soil
aqaan, taqaan, yaqaan, naqaan
känner till | know(s)
carro-guur -ka *jordflykt* | soil
erosion
wada *alla, helt och hållet* | all,
completely

si + u *så att, för att* | so that, in order
to
joojiyaa *stoppa* | stops

Qabashada shinnida

Dadka qaarkood baa lacag ku hela qabashada shinnida. Iyagu waxa ay isku tolaan ulo si ay u sameeyaan gaangurta shinnida.



qabashada shinnida *biodling* |
beekeeping

isku tolaa *sätter ihop* | *puts together*
gaangurta shinnida *bikupa* |
beehive

Ka dibna gaangurta waxa ay ^{sudhaan} _{suraan} laamaha geedaha. Kolka ay gasho shinnidu gaangurta ayaa ay bilowdaa in ay samayso malabka.

suraa / sudhaa *hänger* | *hangs*

Kolka ay shinnidu buuxiso gaangurta ayaa ay dadka beertay kala baxaan malabka. Malabka waxa loo isticmaalaa cunto ahaan. Waxa kale oo malabka loo isticmaalaa dawo ahaan. Malabka aad baa uu u macaan yahay.

kala baxaa *tar ut, tar bort* | *takes out, removes*

ahaan -ta *att vara, som* | *to be, being, -wise*

Beerfalaha

Dad badan oo Soomaali ah ayaa beeraley ah. Waxa ay ka beeraan beerahooda dalagyo xilliyada roobka.

dalag -ga *gröda* | *crop*

Beeraleydu waxa ay beeraan laba dalag oo kala nooc ah. Waxa ay beeraan dalagyo ay cunto uga dhigaan qoysaskooda.

Waxa aynu u naqaannaa kuwan **dalagyada la quuto**. ^{Hadhuudhka Haruurka,} galleyda iyo digirtu waa dalagyada la quuto.

quutaa äter, livnär sig på ngt | eats, feeds on sth

Beeraleydu waxa kale oo ay beeraan dalagyo ay iibiyaan si ay lacag u helaan. Dalagyadan waxa loo yaqaan **dalagyada naqdiga**. ^{hadhuudhku} Galleyda, digirta iyo ^{hadhuudhku} waxa kale oo ay yihiin dalagyada naqdiga.

naqdi -ga kontanter | cash

Dalagyada naqdiga

Kuwani waa qaar ka mid ah dalagyada ay beeraleydu u beertaan si ay lacag uga helaan.

Digirta



Beeraleyda qaarkood ayaa ^{beerata beerta} digirta. Waxa ay digirta beeraan xilliga Guga. Digirtu waxa ay ku baxdaa saddex bilood.

Gu', Guga vår | spring

1. Soo ogow haddii ay beeraleydu ku beerto digirta deriskiinna.
2. Maxaa aynu u beerannaa digirta?

Haruurka^S / Hadhuudhka^N



Beeraley badan ayaa beera
hadhuudhka sababta oo ah
haruurka dalaggani uma baahna biyo
badan.

sababta oo ah på grund av att |
because, since, for the reason that
waraab -ka bevattning | irrigation

Hadhuudhka waxa laga beeraa
Haruurka beeraha waraabka iyo
beeraha roobka labadaba.

Hadhuudhka aynu beerannaa waa
Haruurka laba nooc. Waa hadhuudh
haruur cas iyo hadhuudh
haruur cad.

cas röd | red
cad vit | white

Hadhuudhka Haruurka casi waxa uu ku baxaa muddo
saddex bilood ah. Hadhuudhka Haruurka caddi waxa uu ku
baxaa lix bilood.

Shimbirohu waa ay jecel yihiin hadhuudhka
haruurka.

Beeraleyda waxa khasab ku ah in ay
shimbiroha dalagga ka ceshadaan.

khasab -ka en obligatorisk, nödvän-
dig sak | an obligatory, necessary
thing + ku för ngn | for sb
ceshadaa behåller för sig själv,
keeps to oneself

Beeraleydu waxa ay beertaa hadhuudhka
haruurka bilaha Abriil iyo Ogost
Agosto. Hadhuudhka Haruurka ku baxa lixda
bilood waxa ay beeraleydu goosataa Dayrta
iyo Guga badhtankooda
bartankooda.


Dayr -ta höst | autumn
bartan / badhtan -ka mitt | middle

1. Soo ogow haddii ay beeraleydu hadhuudhka
haruurka ku beeraan deriskiinna.

2. Maxaa aynu u isticmaalnaa hadhuudhka
haruurka?

Galley

Beeraley badan ayaa ^{beerata}beerata galleyda.



Galleydu waxa ay ka baxdaa meeshii roob badan. Galleydu waxa kale oo ay ka baxdaa beeraha waraabka. Beeraleydu waxa ay galleyda beeraan xilliyada Guga iyo Dayrta.

Galleydu waxa ay ku baxdaa muddo ah 90 ilaa 105 cisho. Marka hore waxa dheeraata jirrida galleyda.

Ka dibna waxa uu geedka galleydu bixiyaa sabuulka.

Beeraleydu waxa ay dalagga galleyda goosataa Xagaaga iyo Jiilaalka bilowgooda.

cisho -da *dag, dygn | day, day and night*

dheeraadaa *blir lång | becomes long*

jirrid -da *stam | stem*

sabuul -ka *majskolv | cob (of maize)*

goostaa *skär av, skördar | cuts off, harvests*

Xagaa -ga *sommar | summer*

Jiilaal -ka *vinter | winter*

bilow -ga *början | beginning*

1. Soo ogow in ay beeraleydu ka beerto galley deriskiinna.


2. Maxaa aynu galleyda u isticmaalnaa?

Khudradda iyo miraha^S / midhaha^N

Beeraleyda qaarkood waxa ay beeraan
khudradda iyo ^{midhaha} miraha.

khudrad -da coll. grönsaker och
frukt | fruit and vegetables

miro / midho -ha pl. frukter, bär
och frön | fruits, berries and seeds



Badanaa waxa laga beeraa beeraha
waraabka sababta oo ah waxa ay u baahan
tahay biyo badan.

Khudradda iyo ^{midhuhu} miruhu inta badan waa
dalagyada lacagta laga helo.

1. Soo ogow haddii ay beeraleydu ka beeran
khudrad iyo ^{midho} miro deriskiinna.

2. Waa noocee khudradda iyo ^{midhaha} miraha ay
beeraleydu beeraan?

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010 & Muqdisho 2001: 41–45

Wadahadallo 74

74.0

- War Cali, xaggee baa aad tagaysaa?
- Waxa aan doonayaa in aan Boorame tago. Immisa baa looga dhaxaa halkan?

74.1

- Xasno, ma waxa aad tagaysaa Boorame?
- Maya, waxa aan doonayaa in aan tago Bulaxaar.
- Immisada baa aad doonaysaa in aad tagto?
- Waxa aan doonayaa in aan tago lixda galabnimo. Waa immisadii immika?
- Waa afartii.
- Bulaxaar intee baa looga dhaxaa halkan? Ma inta Boorame looga dhaxo?
- Haahey.
- Waa immisa habeen iyo immisa maalmood?
- Waa laba habeen oo keliya.

74.2

- Ismaaciil, in aad Hargeysa tagto ma doonaysaa?
- Maya. Waxa aan doonayaa in aan Boorame tago.
- Waayo?
- Aabbahay baa jooga.

74.0

- War Cali, xaggeed tagaysaa?
- Waxaan doonayaa in aan Boorame tago. Immisaa looga dhaxaa halkan?

74.1

- Xasno, ma waxaad tagaysaa Boorame?
- Maya, waxaan doonayaa in aan tago Bulaxaar.
- Immisadaad doonaysaa in aad tagto?
- Waxaan doonayaa in aan tago lixda galabnimo. Waa immisadii immika?
- Waa afartii.
- Bulaxaar intee looga dhaxaa halkan? Ma inta Boorame looga dhaxo?
- Haahey.
- Waa immisa habeyn iyo immisa maalmood?
- Waa laba habeyn oo keliya.

74.2

- Ismaaciil, in aad Hargeysa tagto ma doonaysaa?
- Maya. Waxaan doonayaa in aan Boorame tago.
- Waayo?
- Aabbahay baa jooga.

- Ma halkaas baa uu deggan yahay?
- Haa.
- Maxaa uu qabtaa?
- Waa macallin.
- Walaalkaana ma macallin baa?
- Maya, immika waa milateri.
- Ma Boorame baa uu ka shaqeeyaa?
- Maya. Waxa uu deggan yahay Jabbuuti.
- Anigu waxa aan doonayaa in aan Hargeysa tago immika.
- Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

- Ma halkaasuu deggan yahay?
- Haa.
- Muxuu qabtaa?
- Waa macallin.
- Walaalkaana ma macallin baa?
- Maya, immika waa milateri.
- Ma Booramuu ka shaqeeyaa?
- Maya. Wuxuu deggan yahay Jabbuuti.
- Anigu waxaan doonayaa in aan Hargeysa tago immika.
- Nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

16.1 Dawaco, diin iyo bakayle

Beri baa waxa jiri jirey dawaco, diin iyo bakayle saaxiibbo ah. Waxa ay wada lahaayeen beer weyn. Shaqada beerta waa ay wada qaban jireen. Beerta waxa ay ku beeri jireen khudaar kala nooc nooc ah. Waxa ay ku beeri jireen yaanyo, qare iyo waxyaalo kale. Xilli gu' ah ayey beertii aad uga shaqeeyeen oo waxa ay ku beereen khudaar badan.



Khudaartii baa baxday, waxana soo dhawaadey wakhtigii la goyn lahaa. Markii la gaaray waqtigii la goyn lahaa, ayey ku heshiiyeen in ay beerta u qaybiyaan saddex meelood. Mid kasta waxaa la siiyey qaybtii uu ka shaqayn lahaa ee uu goyn lahaa.

Waxa ay bilaabeen shaqadii hase yeeshee diinkii ayaa gaabiyey oo shaqadiisii si fiican u qaban waayey. Markaas waxaa xanaaqey oo carooday dawacadii.

Dawacadii waxa ay bakaylihii u sheegtay in uusan diinku shaqadiisa si fiican u qabanayn.

khudaar -ta frukt och grönt ▪ fruit
and vegetables

kala olika ▪ different

yaanyo -da tomatar ▪ tomatoes

xilli -ga period ▪ period of time

gu' -ga vår, regnperiod ▪ spring,
rainy season

baxaa växer, kommer upp ▪ grows,
comes up

gooyaa, inf. goyn skär av, skördar ▪
cuts off, harvests

gaaraa kommer (fram) ▪ comes,
arrives

hase yeeshee men, fast, dock ▪ but,
however

gaabiyaa är långsam ▪ is slow

xanaaqaa blir arg ▪ becomes angry

caroodaa blir arg ▪ becomes angry

uusan = aanu han inte ▪ he not

Dawacadii waxay damacday in ay disho diinka oo ay aasto. Dawacadii hog bay ka hoos qodday geed weyn oo ku yaallay beertooda.



Goor habeen ah ayey dawacadii, diinkii iyo bakaylihii wada fariisteen meel beerta ka mid ah. Iyaga oo wada fadhiya ayey dawacadii diinkii ku tiri, "Orod oo qaraha aan ku illoobay geedka weyn ee beerteenna hoostiisa ah iiga soo qaad."

Bakaylihii waa uu gartay khiyaanada ku jirta codsiga dawacada oo ah in ay disho diinka isla markaana xabaasho. Bakaylihii waxa uu ku yiri diinkii, "Haye iyo diiday, midna ha dhihin. Ha tegin hadda, waayo waa madow. Berri baad u soo qaadi doontaa, iska dhaaf hadda."

Diinkii waxa uu tusay hog weyn oo dawacadu ay ka qodday geedka weyn hoostiisa.

Bakaylihii iyo diinkii waxa ay goosteen in beerta loo kala qaybsado saddex meelood oo

damcaa, damacdaa önskar, vill ▪ wishes, wants
aasaa gräver ner, begraver ▪ buries
hog -ta hâl, grop ▪ hole, burrow
qodaa gräver ▪ digs

goor -ta tidpunkt ▪ point in time

illoobaa glömmar ▪ forgets
gartaa, garataa förstår, uppfattar ▪ understands, gets it
khiyaano -da trick, lurendrejeri ▪ trick, fraud
codsi -ga begäran ▪ request
dilaa, dishaa dödar ▪ kills
xabaalaa, xabaashaa gräver ner, begraver ▪ buries

haye javisst, okej ▪ yes, sure, okay
iyo här: eller ▪ here: or
diiday här: jag vägrar ▪ here: I refuse

midna ingetdera ▪ neither
ha + red. subj. låt bli, gör inte ▪ don't

dhahaa, past. subj. **dhihin** säger ▪ says

waayo för, därför att ▪ since, because

iska dhaaf låt det vara ▪ let it be, leave it alone

goostaa, goosataa beslutar ▪ decides
meel -sha plats, del ▪ place, part

isle'eg. Bakaylihii iyo diinkii waxa ay fikraddooda u sheegeen dawacadii. Dawacadii waa ay ku raacday. Dawacadii waxa ay garatay in bakaylaha iyo diinku ay ogaadeen khiyaanadeedii. Dawacadii way ka xumaatay in la ogaado arrinta.

Diinkii iyo bakaylihii mid waliba qaybtiisii ayaa uu ka qaatay beertii. Mar dambe, dawaco, diin iyo bakayle beer ma wada yeelan. Dawacadii god ayay u qodday diinkii, laakiin kuma guuleysan.

God khiyaano ha qodin, haddii aad qoddidna, ha dheereyn, ku dhici doontaana, lama ogee.



isle'eg *likadan* ▪ same, alike

fikrad -da *tanke, idé, åsikt* ▪ thought, idea, opinion

ka xumaadaa, -aataa *blir besviken, ledsen över* ▪ gets disappointed, sad, upset over

yeelaa *gör, utför* ▪ makes, carries out

guulaystaa, -sataa *vinner, lyckas, har framgång* ▪ succeeds, wins

dhacaa, inf. **dhici** *faller, ramlar, händer, inträffar* ▪ falls, happens, occurs

Erayo su'aaleed

Qofkee ...?

Maxaa ...?

Halkee ...?

Goorma ...?

Waayo ...?

Immisa ...?

Kuwani waa erayo su'aaleed. Waxa aan isticmaalnaa erayadan marka aan su'aalo is weydiinayno.

Qor shan su'aalood ee ku saabsan sheekada. Xusuusnow in aad dhigtid (?) meesha ay ku dhammaato su'aashaada. Dabadeed weydii saaxiibkaa in uu ka jawaabo su'aalahaaga.

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 85–89

16.2 Labadii tuug

Waa baa waxa jirey laba tuug oo saaxiibbo ahaa. Maalin maalmaha ka mid ah waxa ay go'aansadeen in ay geed fariistaan oo ay fiirsadaan dadka magaalada u socda. Dabadeed labadii tuug waxa ay arkeen nin wada ri' oo magaalada u socda. Isla markiiba waxa ay heleen ra'yi oo ay ku khiyaanaan ninkii rida watey.

go'aansadaa bestämmer sig
khiyaanaa *lurar*

Mid ka mid ah labada nin waxa uu iska dhigay nin indha la'. Waxana uu ka codsaday ninkii rida lahaa in uu usha u qabto si uu u hago inta ay ka gaarayaan magaalada. Dabadeed ninkii rida lahaa waa uu ogolaaday codsigii tuuggii iska dhigayey indhoolaha. Laakiin iyaga oo socodkii ku jira ayaa tuugii kale ridii ka xaday intii uu ku mashquulsanaa hagidda tuuggii indhoolaha iska dhigayey.

iska dhigaa låtsas vara, spelar,
härmar
il, pl. indho öga
indha la' *blind*
ka codsadaa ber ngn om ngt
hagaa leder, för
indhool -ha (indhool -ka)
blind person
xadaa stjal
mashquulsan upptagen

Erayo

Isku aaddi erayada iyo macnahooda.

dhaqso, iska dhigid, ku raacay, indhool

dhaqso -da *snabbhet*

aan arki karin, yiri haa, deg-deg, wax samayn

Erayo su'aaleed

Qor afar su'aalood ee ku saabsan sheekada. Isticmaal erayo su'aaleedyo sida *qofkee*, *halkee*.

Magacyo

Qor weerahan. Hoos ka xarriiq magacyada ku jira.

1. Muqdisho waa caasimadda Soomaaliya. caasimad -da huvudstad, storstad
2. Tuugadii waxa ay xadeen ridii saboolkii. sabool -ka fattig person
3. Xasan Jimce waliba waxa uu aadaa masaajidka.
4. Baqashu waa xayawaan aan caadi ahayn. aan caadi ahayn *ovanlig*
5. Soomaalidu waxa ay jeceshay sheekooyinka Juxa.

Guuri jadwalkan.

Ku qor magacyada meesha ku habboon.

magac gaar ah	magac guud

Qor waraaq martiqaad ah.

martiqaad -ka *inbjudan*

Waxa aad soo booqan doontaa ayeeydaa oo joogta Beledweyne. Ku marti-qaad saaxiibkaa in uu ku raaco.

booqdaa, booqataa *besöker*

Xiriiriyayaal

Ku buuxi meelaha bannaan *ama, iyo, laakiin, mise.*

1. Dibiyadu waxa ay leeyihiin geeso lo'du ma laha.

2. Gorayadu waa shimbir ma duuli karto. *gorayo -da struts*

3. Markii uu qabow jiro waxa aan qaadannaa shaati, funaanad jaakad. *funaanad tröja*

4. Ma jirran tahay hurdo ayaa ku haysa? *jirran sjuk*

5. Waxa aan doonayey in aan ku soo booqdo ma ogeyn meesha aad ku nooleyd.

6. Ma soconnaa waa nasannaa? *nastaa, nasataa vilar*

7. Waxa aan jeclahay moos, saytuun cambe.

8. Adigu ma qosleysaa waad ooyeysaa?

Guuri weerahan.

Ka dooro falka saxa ah.

1. Hooyo waxa ay naxariis. (leedahay, leeyihiin)

2. Dadka u sameeya wanaagga dadka kale, waxa (gartaan, garteen) khayrka ku jira. *khayr -ka något bra, välstånd, vålgång*

3. Ridu waxa caano. (leeyihiin, leedahay)

4. Shinnidu waxa ay (sameeyaan, samaysaa) malab.


5. Ratigu waxa uu biyo. (cabaa, cabbaan)

6. Waxa kugu waajib ah in aad shan salaadood maalin waliba. (tukatid, tukatay) *waajib -ka skyldighet*
salaad -da bön

7. si toos ah dhaqanka Islaamka. (u raac, raac)

toos -ka direkt väg, rak väg
dhaqan -ka kultur, tradition,
livsstil, uppförande

Qor sheeko ku saabsan sawirkan.



Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 140–142

Wadahadallo 75

bayraa / baydhaa *svänger* | turns, changes direction

dhaafaa, dhaaftaa *passerar, lämnar bakom sig* | leaves behind

horta *förresten* | by the way

maraa, martaa *går längs, följer, tar (en väg)* | goes along, follows, takes (a road)

sakad -da / seked -da *kvarter* | block (of buildings)

75.0

- Xuseen, xaggee baa aad tagaysaa?
- Waxa aan doonayaa in aan suuqii tago ee ii tilmaan.
- Waddadaas mar oo kolka aad laba sakadood dhaafto bidixda u baydh.
- Mahadsanid.
- Adiga baa mudan.

75.1

- Xuseen, xaggee baa aad ka timid?
- Waxa aan ka imid Ceerigaabo. Immikana waxa aan doonayaa in aan suuqii tago ee ii tilmaan.
- Waddadaas mar oo kolka aad saddex sakadood dhaafto midigta u baydh.
- Adigu in aad tagto ma doonaysaa?
- Maya. Waxa aan afarta tagayaa Berbera.
- Immika waa immisadii saacaddu?
- Waa afartii oo toban daqiiqo la'.
- Berbera intee baa ay jirtaa?

75.0

- Xuseen, xaggeed tagaysaa?
- Waxaan doonayaa in aan suuqii tago ee ii tilmaan.
- Waddadaa mar oo kolkaad laba sakadood dhaafto bidixda u baydh.
- Mahadsanid.
- Adaa mudan.

75.1

- Xuseyn, xaggeed ka timid?
- Waxaan ka imid Ceerigaabo. Immikana waxaan doonayaa in aan suuqii tago ee ii tilmaan.
- Waddadaa mar oo kolkaad saddex sakadood dhaafto midigta u baydh.
- Adigu in aad tagto ma doonaysaa?
- Maya. Waxaan afarta tagayaa Berbera.
- Immika waa immisadii saacaddu?
- Waa afartii oo toban daqiiqo la'.
- Berbera intay jirtaa?

- Waa boqol iyo toddobaatan kiiloomitir oo saddex saacadood bay jirtaa.
- Oo Burcona ma intaas baa ay u jirtaa halkan?
- Maya, ka fog. Waxa ay u jirtaa boqol iyo sagaashan kiiloomitir.
- Immika baa aan suuqii tagayaa ee nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

75.2

- Cali, suuqii ma fog yahay?
- Maya.
- Waa xaggee?
- Waa halkaas ee labada sakadood marka aad dhaafto, midigta u baydh.
- Horta, Muqdisho Hargeysa intee baa ay u jirtaa?
- Boqolaal kiiloomitir baa ay u jirtaa.
- Immisa saacadood baa loo socdaa?
- Waxa loo socdaa afar iyo labaatan saacadood.
- Mahadsanid.
- Adiga baa mudan.

- Waa boqol iyo toddobaatan kiiloomitir oo saddex saacadood bay jirtaa.
- Oo Burcana ma intaasay u jirtaa halkan?
- Maya, ka fog. Waxay u jirtaa boqol iyo sagaashan kiiloomitir.
- Immikaan suuqii tagayaa ee nabadgelyo.
- Nabadgelyo.

75.2

- Cali, suuqii ma fog yahay?
- Maya.
- Waa xaggee?
- Waa halkaas ee labada sakadood markaad dhaafto, midigta u baydh.
- Horta, Muqdisho Hargeysa intay u jirtaa?
- Boqolaal kiiloomitir bay u jirtaa.
- Immisa saacadood baa loo socdaa?
- Waxa loo socdaa afar iyo labaatan saacadood.
- Mahadsanid.
- Adaa mudan.

17.1 Libaax iyo jiir

U shaqeyta kooxo saddex-saddex ah. Mid idinka mid ah waa jiir, midna waa libaax, kan kalena waa wariye.

Ma og tahay libaax barqo seexday iyo jiir ku kor socday oo iska war la' wixii kala qabsaday. Libaaxu had iyo goor marka xaaladdisu ay tahay caadi ee uu dheregsan yahay waxa uu jecelyahay in uu barqo seexdo.



Wariye: Libaax ku noolaa meel kayn ah, ayaa goor barqo ah geed har qabow hoos seexday. Libaaxii oo hurdo ku jira ayaa waxa ku soo baxay jiir socda oo iska war la'. Jiirkii waxa uu socdaba libaaxii ayaa uu madaxa ka fuulay isaga oo doonaya in uu dhanka kale uga sii gudbo. Libaaxu waa wax aad u feejigane isla markiiba inta uu kacay ayaa uu qabtay jiirkii.

Libaaxii: "Sidee baad hurdada iiga kicin kartaa?"

wariye -ha reporter,
berättare | reporter, storyteller

og medveten | aware
og yahay vet | knows
barqo -da sen morgon, förmiddag |
late morning
iska war la' omedveten | unaware
la' utan, som saknar | without,
lacking
qabsadaa gör, orsakar | does, causes
had iyo goor alltid | always
xaalad -da situation
caadi -ga något normalt, vanligt ▪
something normal
dheregsan -aa nöjd, mätt | satisfied,
full

har / hadh -ka skugga | shade
qabow kall | cold

dhan -ka sida | side
gudbaa passerar | passes, crosses
feejigan alert | attentive, careful
kacaa vaknar, stiger upp | wakes up,
gets up
qabtaa, qabataa fångar | catches

kiciyaa väcker | wakes sb up

Jiirkii: "Anigu ma doonayn in aan hurdada kaa kiciyo, waase iga noqotay ee iga raalli ahow."

waase < waa+se
-se *men* | but
raalli -ga *tolerant, förlåtande person*
| *tolerant, forgiving person*

Libaaxii: "Sow ma ogid in aan ku dili karo hadda oo aad gacantayda ku jirto?"

ogid < og+tihid

Jiirkii: "Waxa aan kaa baryayaa in aad i nabad geliso markan."

ka baryaa (m.), **baridaa** (f.) *ber ngn om ngt* | asks sb for sth
daayaa *lämnar i fred* | leaves alone, in peace

Libaaxii: "Oo haddii aan ku daayo ma kol baad wax taraysey? Sow ma ogid in aan kugu burburin karo daqiiqado dhexdood?"

kol en gång, någonsin | once, ever
wax taraa *är till någon nytta* | is of any use
daqiiqado dhexdood *inom några minuter* | within minutes

Jiirkii: "Haddii aad maanta i dayso mar uun baan kuu abaal gudi doonaa."

burburiyaa *krossar, tillintetgör* | destroys, ruins, wrecks
mar -ka *en gång* | an occasion, once
uun *bara, ändå* | only, just

Libaaxii inta uu hadalkii jirka ku qoslay ayaa uu yiri, "Anigu waan ku daynayaa, hase yeeshee ilama aha in aad ii abaal gudi kartide, orod oo hortayda ka tag."



Wariye: Dhowr maalmood ka dib ayaa libaaxii ku dhacay dabin loo dhigay. Markaas ayuu ciyey oo raftay kuna dadaalay in uu dabinka ka baxo, laakiin xooggiisii iyo dadaalkiisii waxba uma tarin.

dabin -ka *fälla* | trap
ciyaa *ryter, skriker* | roars, screams
raftaa *vrida sig i plågor* | writhe from suffering
dadaalaa *kämpar* | tries hard, struggles
dadaal -ka *kamp, anstränging* | struggle

Jiirkii: "Ha murugoon! Aniga ayaa kaa saari doona dabinka."

ha + red. subj. *låt bli att* | *don't*
murugoodaa *blir ledsen,*
orolig | *becomes sad, anxious*
kaa < ku+ka *dig+från* | *you+from*
ka saaraa *tar ut* | *takes out*

Wariye: Jiirkii waxa uu bilaabay in uu ilkihiisii afka badnaa ku jarjaro dabinkii xarigga ka samaysnaa. Muddo yar ka dibna libaaxii waa uu ka baxay dabinkii. Libaaxii waa uu farxay.

jarjaraa *skär i små bitar* | *cuts into small pieces*

farxaa *blir glad* | *becomes happy*

Libaaxii waa uu u mahad celiyey jiirkii ka saaray dhibaataadii qabsatay. Waxana u yiri, "Uma malayn jirin in bahal yar oo adoo kale ahi uu waxtar leeyahay."

dhibaato *svårighet,*
problem | *difficulty, problem*
bahal -ka *vilddjur* | *wild animal*
waxtar -ka *nytta* | *use, usefulness*

Jiirkii waxa uu ugu jawaabey, "Ku tala gal, hadda ka dib in bahallada yar-yari ay caawin karaan una abaal gudi karaan kuwa waaweyn."

Bahal waliba ee Alle abuuray waxtar buu leeyahay.

Uga jawaab su'aalahan buuggaaga layliga.

1. Sidee buu libaaxu ku qabtay jiirkii?
2. Maxaa uu u sii daayey jiirkii?
3. Maxaa uu libaaxu ugu qoslay jiirkii?
4. Maxaa ku dhacay libaaxii maalmo yar ka dib?
5. Sidee buu jiirkii u caawiyey libaaxii?
6. Maxaa uu libaaxu ugu maleeyey in uusan jiirku waxba tarayn?

u maleeyaa *tror* | *thinks, believes*

Jila sheekadan

U shaqeeya kooxo saddex-saddex ah. Mid waxa uu noqonayaa wariye. Midka kale waa libaax. Kan kalena waa jiir.

jilaa *spelar (teater) | performs (a play)*

Magac-u-yaallo

Fiiri qoraalkan gaaban. Ma hagaajin kartaa adiga oo isticmaalaya magac-u-yaallo?

Jiirkii waxa uu ku dhacay libaaxii madaxiisii. Jiirkii ayaa aad u baqay.

Libaaxii waxa uu eegay jiirkii.

Libaaxii waxa uu furay afkiisii. Waa ciyey. Jiirkii waxa uu arki karey libaaxii ilkihiisii.

Libaaxii ilkihiisa waxa ay u ekaayeen kuwo af leh.

magac-u-yaal -ka
pronomén | pronoun

hagaajiyaa *ordnar, fixar, förbättrar | puts in order, fixes, improves*

baqaa *blir rädd | gets scared*

ekaayeen < *eg+ahaayeen
af leh *skarp, vass | sharp*

U shaqeeya koox-koox

Ka dooda su'aalahaan.

1. Sheeg waqti uu qof ku caawiyey. Maxaa aad dareentay?

2. Sheeg waqti aad qof caawisey. Maxaa aad dareentay?

3. Maxaa aad ka qabtaa in dadka kale la caawiyo?

dareemaa, dareentaa *känner | feels*

ka qabaa *tycker, anser ngt om ngt | thinks, considers sth about sth*


Qor sheeko

Qor sheeko ku saabsan mar uu qof ku caawiyey.

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 99–103

17.2 Libaaxyo

Maxaa aad ka taqaan libaaxyada?



Akhri qoraalkan kana raadi jawaabaha su'aalaha soo socda.


1. Maxaa aan ugu yeernaa koox libaaxyo ah?
2. Maxaa ay cunaan libaaxyadu?
3. Immisa hilib ah ayaa uu cuni karaa libaaxu?

*ugu yeeraa kallar ngt för ngt | calls
sth sth*

4. Maxaa ay sameeyaan libaaxyadu inta badan maalintii?

Kuwani waa libaaxyo. Waxa ay ku nool yihiin inta badan dhulka siman. Ma jecla dhulka kaymaha ah. Raxan waliba waxa ay leedahay meel u gaar ah. Raxantaasi waxa ay la dagaallantaa ciddii soo gasha aagooda.

Libaaxa labka ahi waxa uu leeyahay dhogor badan. Waxa aan ugu yeernaa dhogortaas baar. Libaaxa dheddigga ahi waa uu ka yar yahay ka labka ah. Libaaxa dheddigga ahi waxaa loogu yeeraa "gool".



Libaaxyadu waxa ay ugaarsadaan xayawaanka kale.

Goosha ayaa inta badan samaysa ugaarsiga xayawaanka. Waxa ay dili karaan dameer-farowga, baciidka iyo lo'-gisiga.

Libaaxyadu aalaa midkiiba waxa ay cuni karaan 10 kiilo oo hilib ah maalin waliba. Laakiin libaaxa labka ahi waxa uu cuni karaa hal mar 40 kiilo oo hilib ah.

Libaaxyadu waxa ay meel hoos ah ku nastaan 16-20 saacadood maalintii.

raxan -ta flock, hjord | herd, flock
siman slät | flat
la dagaallamaa strider mot | fights against
cid -da folk, person(er), den (som) | people, person(s), who(ever)
aag -ga område, omgivning, grannskap | area, surroundings, neighbourhood
dhogor -ta päls | fur
baar -ka man | mane
loogu < la+u+ku
gool -sha lejonhona | lioness

ugaarsadaa jagar | hunts

ugaarsi -ga jakt | hunt
dameer-farow -ga zebra
baciid -ka [oryx](#) [typ av antilop | kind of antelope]
lo'-gisi -ga buffel | buffalo

aalaa vanligtvis, ofta | usually, often
midkiiba var och en | each one

hal mar på en gång | at once, at the same time

nastaa, nasataa vilar | rests

Maxaa aad ka baratay taariikhda libaaxyada?

Dhammaystir weerahan


Waxa aan mar hore ogaa in

Waxa aan ogaaday in

Sida oo kale waxa aan ogaaday in

Shayga iigu xiiso badan ee aan ka barto libaaxa waa in

xiiso badan *intressant* | interesting
iigu < *i+u+ugu mest ... för
mig | most ... to me



Erayadan kuwee baa sifaynaya libaax?

geesi, tabar daran, yar, xoog leh, baqaya, naxariis daran, caajis, hurdaysan, fahmo leh, horror ah, khatar ah, saaxiibtinnimo

Qor qoraal gaaban ee ku saabsan libaax.

Isticmaal tilmaamayaal si aad qoraalkaaga uga dhigtid mid xiiso leh.

geesi -ga *modig person*
tabar -ta *styrka* | strength
tabar daran *orkeslös* | weak, lacking strength
naxariis daran
skoningslös | merciless, cruel
caajis -ka *lättja* | laziness
hurdaysan *sömning* | sleepy
fahmo -da *förstånd*,
intelligens | understanding, intelligence
horror -ka *rovdjur* | predator
xiiso leh *intressant* | interesting

Af-Soomaali, Fasalka 3aad, Muqdisho 2001: 104–106

Wadahadallo 76

76.0

- Ninkaas ma taqaan?
- Haa, waa aan aqaan. Waa saaxiibkay.
- Af Soomaaliga ma yaqaan?
- Maya, ma yaqaan.

76.1

- Yuusuf, maxaa aad sheegtay?
- Nabad ee adigu iska warran.
- Waa nabad.
- Waar, ma taqaan ninkaas?
- Haa, waa aan aqaan.
- Waa kuma?
- Waa saaxiibkay.
- Maxaa uu qabtaa?
- Waa macallin. Waxa uu ka shaqeeyaa Burco.
- Ma halkaas baa uu deggan yahay?
- Ma ogi.
- Adigu ninkaas ma taqaan?
- Haa, waa aan aqaan oo waa Maraykan.
- Isna ma macallin baa?
- Haa, waa macallin.
- Ma yaqaan af Soomaaliga?
- Maya, ma yaqaan. Af Ingiriiska iyo af Xabashiga oo keliya ayaa uu yaqaan.

76.2

- Naayaa Caasha, af Ingiriiska ma taqaan?

76.0

- Ninkaa ma taqaan?
- Haa, waan aqaan. Waa saaxiibkay.
- Af Soomaaliga ma yaqaan?
- Maya, ma yaqaan.

76.1

- Yuusuf, maxaad sheegtay?
- Nabad ee adigu iska warran.
- Waa nabad.
- Waar, ma taqaan ninkaa?
- Haa, waan aqaan.
- Waa kuma?
- Waa saaxiibkay.
- Muxuu qabtaa?
- Waa macallin. Wuxuu ka shaqeeyaa Burco.
- Ma halkaasuu deggan yahay?
- Mooyi.
- Adigu ninkaa ma taqaan?
- Haa, waan aqaan oo waa Maraykan.
- Isna ma macallin baa?
- Haa, waa macallin.
- Ma yaqaan af Soomaaliga?
- Maya, ma yaqaan. Af Ingiriiska iyo af Xabashiga oo keliya ayuu yaqaan.

76.2

- Naayaa Caasha, af Ingiriiska ma taqaan?

- Haa, waa aan aqaan.
 - Af Xabashigana?
 - Anigu af Xabashiga ma aqaan, laakiin saaxiibkay baa yaqaan.
 - Saaxiibkaa waa kuma?
 - Waa Jaamac.
 - Jaamac ayo?
 - Jaamac Cabdi.
 - Oo ma Xabashi baa?
 - Haa. Immika waa Xabashi. Adigu ma taqaan af Ingiriiska?
 - Maya, laakiin walaalkay baa yaqaan.
 - Walaalkaa ma halkan baa uu deggan yahay?
 - Haa. Ma meel baa aad tagaysaa immika?
 - Waa immisadii?
 - Waa kow iyo tobankii iyo rubuc.
 - Haa, waxa aan doonayaa in aan suuqii tago. Adigu ma doonaysaa in aad tagto?
 - Haahey.
- Haa, waan aqaan.
 - Af Xabashigana?
 - Anigu af Xabashiga ma aqaan, laakiin saaxiibkay baa yaqaan.
 - Saaxiibkaa waa kuma?
 - Waa Jaamac.
 - Jaamac ayo?
 - Jaamac Cabdi.
 - Oo ma Xabashi baa?
 - Haa. Immika waa Xabashi. Adigu ma taqaan af Ingiriiska?
 - Maya, laakiin walaalkay baa yaqaan.
 - Walaalkaa ma halkanuu deggan yahay?
 - Haa. Ma meel baad tagaysaa immika?
 - Waa immisadii?
 - Waa kow iyo tobankii iyo rubuc.
 - Haa, waxaan doonayaa in aan suuqii tago. Adigu ma doonaysaa in aad tagto?
 - Haahey.

18. Hawlaha ka socda deriska

Qaybta 4aad


Dalagyada ganacsiga

Beeraleydu waxa ay ula ^{hadhaan} haraan dalaggooda wax ka mid ah baahidooda. Waxa ay ku kaydsadaan dalagyadan bakhaarradooda.

ula haraa / hadhaa *remains with sth for some purpose | leaves for, saves for*
bakhaar -ka *förråd, magasin | depot, storehouse*

Ka dib beeraleydu waxa ay ka iibiyaan inta ^{hadha} hara ganacsato. Beeraleydu lacagta ay ka hesho dalagga waxa ay ku iibsadaan walxo kale ee ay qoysaskoodu u baahan yihiin.

ganacsato -da *coll. affärsmän | businessmen*




Ganacsatadu waxa ay geeyaan dalagyada suuqa magaalada u dhow. Ka dib waxa ay iibiyaan dalagyada.



Ganacsatadu waxa ay dalagyada kaga iibsadaan beeraleyda sicir jaban. Ka dib ganacsatadu waxa ay isku daydaa in ay dalagyadan sicir sarreeya ku gadaan. Sidani waa habka ay ganacsatadu ku samayso lacag.

kaga < ku+ka
ku + sicir jaban *för ett lågt pris | at a cheap price*
ka + beeraleyda *från bönderna | from the farmers*
isku dayaa *försöker | tries*
sarreeyaa *är högre, överstiger, är överordnad | is higher, is superior*
gadaa *säljer | sells*
hab -ka *sätt, metod | manner, method*

Khudradleyda



Beeraleydu waxa ay khudradda iyo ^{midhaha} miraha ka iibiyaan khudradleyda. Khudradleydu waxa ay dalaggaan kaga iibsataa beeraleyda sicir jaban. Ka dib waxa ay khudradleydu isku daydaa in ay suuqa kaga hesho sicir sarreeya. Sidani waa habka ay khudradleydu ku samayso lacag.

1. Soo booqo suuqa kuugu dhow.
2. Soo ogow dalagyada, khudradda iyo ^{midhaha} miraha iibka ah.
3. Weydii ganacsatada halka ay dalagyadu uga yimaadaan.

Ka ganacsiga xoolaha nool

Reer-guuraaga iyo qaar ka mid ah beeraleyda ayaa dhaqda geela, ^{adhiga} ariga iyo lo'da. Xayawaan-kan waxa aynu u naqaannaa **xoolaha nool**.

dhaqdaa, dhaqataa föder upp | breeds

Mararka qaarkood reer-guuraaga iyo beeraleydu waxa ay xoolaha geeyaan ^{sayladda} suuqa xoolaha ee ugu dhow si ay uga iibiyaan.

si + u för att, så att | in order to

Ganacsatada xoolaha nool ayaa yimaadda ^{sayladahan} suuqyadan. Waxa ay iibsadaan xoolaha.




Ganacsatadu xoolaha ay iibsadeen waxa ay ku geeyaan ^{sayladaha} ^{suuqyada} magaalooyinka baabuur.

ku geeyaa transporterar | *ngt med ngt* | transports sth by/with sth

Qaar ka mid ah ganacsatada xooluhu waxa ay xoolaha u dhoofiyaan Sucuudiga iyo dalal kale oo Carbeed. Dadka Carabtu waxa ay jecel yihiin xoolaha Soomaalida sida ^{adhiga} ariga, geela iyo lo'da.

dhoofiyaa exporterar | *exports*
Sucuudiga Saudiarabien | *Saudi Arabia*
dal -ka, pl. **dalal -ka** land | *country*
Carbeed adj. *arabisk* | *Arabic*
Carab -ta coll. *araber* | *Arabs*



Ganacsatada xooluhu waxa ay xoolaha saaraan maraakiib.

markab -ka, Ar. pl. **marakiib -ta** *fartyg* | *ship*

1. Soo ogow sicirka ^{adhiga} ariga, lo'da iyo geela ee ^{seyladda} jooga ^{sluuqa} kuugu dhow.

2. Sicirka xooluhu waa uu is beddelaa bil kasta.

is beddelaa *förändras* | *changes (itself)*
bil -sha *månad* | *month*

3. Soo ogow kolka uu sicirka xooluhu ugu sarreeyo.

kol -ka *tidpunkt* | *point in time*
ugu indicates the highest degree, the superlative


4. Soo ogow marka uu sicirka xooluhu aalaa ugu hooseeyo.

aalaa *ofta, vanligen* | *often, usually*
hooseeyaa *är låg/lägre* | *is low(er)*

Hiliblaha

Ganacsadaha xooluhu waxa kale oo uu xoolaha qaar ka mid ah ka iibiyaa hiliblaha.

Xoolaha waxa lagu soo qalaa kawaanka. Ka dib hiliblaha waxa uu qaataa neefkii oo qalan.



Hilibleyaashu waa dad xirfad leh. Waxa ay yaqaanaan sida loo qalo xoolaha iyo xubin walba halka laga jaro.

Ka dib hilibleyaashu waxa ay hilibka ka iibiyaan dadka. Waxa ay iibiyaan hilibka geela, lo'da iyo ^{adhiga} ariga.

Hilibleyaasha qaarkood baa leh dukaan. Dukaanka waxa la yiraahdaa hilibka. Hilibleyaasha qaar baa ka shaqeeya suuqa hilibka.

1. Soo ogow sicirka kiilooga hilibka ah ee lo'da, ^{adhiga} ariga iyo geela.

2. Hilibkee baa ugu qaalisan?

ganacsade -ha *affärsman* |
businessman

qalaa *slaktar, skär av halsen* |
slaughters, cuts the throat

kawaan -ka *slakteri(butik)* |
slaughterhouse, butcher's shop

neef -ka *tamboskap* | *domestic cattle*
qalan *slaktad* | *slaughtered*

xirfad -da *yrke, hantverk* | *profession, craft, skill*

xirfad leh *yrkesskicklig* | *professionally skilled*

xubin -ta *kroppsdel* | *body part*


hal -ka *plats* | *place*

jaraa *skär (av)* | *cuts*

ka iibiyaa *säljer till* | *sells to*
kiiloo -ga *kilo* | *kilo*

qaalisan *dyr* | *expensive*

Kalluumaysato



kalluumaysato -da coll. *fiskare* |
fishermen

Dadka ku nool xeebaha qaarkood ayaa lacag ka hela kalluumaysiga. Waxa ay adeegsadaan doonyo iyo shabakado si ay kalluunka u soo qabsadaan.

Ka dib waxa ay kalluunka ka iibiyaan ganacsato oo doonyaha ku suga dekedda. Ganacsatadu waxa ay iibsadaan kalluunka ugu fiican.

Ganacsatadu waxa ay u diraan dad kale oo qala kalluunka. Ka dibna waxa ay ganacsatadu kalluunka ka sii iibisaa dad kale oo iyagu ku iibiya suuqa.

kalluumaysi -ga *fiske* | *fishing*
doon -ta, pl. **doonyo -ha** *båt* | *boat*
shabakad -da *nät* | *net*
si + u *för att* | *in order to*
qabsadaa *jagar* | *chases*
soo qabsadaa *fångar* | *catches*

deked -da *hamn* | *harbour, port*

u diraa *skickar ngt till ngn* | *sends sth to sb*

oo iyagu *som i sin tur* | *who in turn*

Cilmiga Bulshada, Fasalka 3aad, Hargeysa 2010 & Muqdisho 2001: 46–52

Wadahadallo 77

daar -ta Ar. (*larger stone*) *building* (cf. Daar es Salaam)

ka **dambeeyaa** *beginner sig bakom ngt* | *is situated behind sth*

waxoogaa *lite* | *a little*

77.0

- Suuqu waa xaggee?
- Labada daarood ee cadcad ayaa uu ka dambeeyaa.

77.1

- Waryaa Nuux, iska warran.
- Nabad ee, maxaa aad sheegtay?
- Nabad. Suuqii ma tagaysaa maanta?
- Suuqu waa xaggee?
- Labada daarood ee cadcad baa uu ka dambeeyaa.
- Haa, waa aan tagayaa.
- Walaalkaa ma daartaas baa uu ku nool yahay?
- Maya. Aabbahay iyo hooyaday baa ku nool.
- Adiguna ma halkaas baa aad ku nooshahay?
- Maya. Waxa aan ku jiraa daarta dheer ee ka dambaysa. Adiguna?
- Waxa aan ku nool ahay meel fog.
- Oo waa xaggee?
- Galbeed baa ay ka xigtaa suuqa.
- Xaaskaaguna ma halkaas baa uu ku nool yahay?
- Anigu xaas ma lihi.
- Walle!

77.0

- Suuqu waa xaggee?
- Labada daarood ee cadcad ayuu ka dambeeyaa.

77.1

- Waryaa Nuux, iska warran.
- Nabad ee, maxaad sheegtay?
- Nabad. Suuqii ma tagaysaa maanta?
- Suuqu waa xaggee?
- Labada daarood ee cadcad buu ka dambeeyaa.
- Haa, waan tagayaa.
- Walaalkaa ma daartaasuu ku nool yahay?
- Maya. Aabbahay iyo hooyaday baa ku nool.
- Adiguna ma halkaasaad ku nooshahay?
- Maya. Waxaan ku jiraa daarta dheer ee ka dambaysa. Adiguna?
- Waxaan ku nool ahay meel fog.
- Oo waa xaggee?
- Galbeed bay ka xigtaa suuqa.
- Xaaskaaguna ma halkaasuu ku nool yahay?
- Anigu xaas ma lihi.
- Walle!

- Haa. Adigu ma leedahay?
- Haa. Laba carruurna waa aan leeyahay.

77.2

- Saacaddu ma shantii baa?
- Maya, waa toddobadii oo toban la'.
- Ma in aad meel tagto baa aad doonaysaa?
- Haa.
- Waa xaggee?
- Saaxiibadday baa aan u tagayaa.
- Immisada?
- Siddeedda.
- Xaggee baa ay ku nooshahay?
- Daartaas weyn ee cad baa ay ku nooshahay.
- Ma daartaas suuqa bari ka xigtaa?
- Haa.
- Ma immika baa aad tagaysaa?
- Maya. Immika waxa aan doonayaa in aan halkan waxoogaa joogo.
- Waa tahay.

- Haa. Adigu ma leedahay?
- Haa. Laba carruurna waan leeyahay.

77.2

- Saacaddu ma shantii baa?
- Maya, waa toddobadii oo toban la'.
- Ma in aad meel tagtaad doonaysaa?
- Haa.
- Waa xaggee?
- Saaxiibadday baan u tagayaa.
- Immisada?
- Siddeedda.
- Xaggay ku nooshahay?
- Daartaa weyn ee cad bay ku nooshahay.
- Ma daartaa suuqa bari ka xigtaa?
- Haa.
- Ma immikaad tagaysaa?
- Maya. Immika waxaan doonayaa in aan halkan waxoogaa joogo.
- Waa tahay.